

# Tilmaanta Waalidka ee Xaquuqda Waxbarashada Gaarka

## Ogeysiiska Habraaca Ammaanka Waxbarashada Gaarka ah

Abriil 2017

Ohio Department of Education

## Ku saabsan Waxbarashada Gaarka ah,

Waxbarashada gaarka ah ee ardayda da'doodu tahay 3 ilaa 21, waxaa lagu maamulaa shuruudaha gobolka iyo kuwa federaalka. Shuruudaha federaalka waxaa loo yaqaan  Xeerka Waxbarasha Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA). Shuruudaha gobolka waxaa loo yaqaan Heerarka hawlgalka Ohio ee Waxbarashada Caruurta Naafada ah (Heerarka Hawlgalka Ohio).

Tilmaamtan waxay ka caawin kara inaad fahamto xuquuqdaada iyo xuquuqda ilmahaaga sida waafaqsan IDEA iyo Heerarka hawlgalka Ohio. Waxa kale oo uu ku siinayaa macluumaad iyo xog si ay kaaga caawiyaan in aad fahanto taagyeerada waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga iyo adeegyada

Dugsiga degmada ee degaankaada ayaa sidoo kale kaa caawin kara inaad fahamto xuquuqdaada sharcigan hoos timaada. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan macluumaadka ku jira buugan tilmaamaha, fadlan la soo xiriir Agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee degmadaada.

### Qofka Lagala soo Xiriiro Dugsigaada Waxbarashada Gaarka ah

Degmada:*Fadlan ku dar wararka soo socda qeybtan falgalka leh:*

**Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ah:**

**Lambarka taleefanka:**

**Cinwaanka emailka:**

### Waaxda Waxbarashada Gaarka ah ee Ohio Kala xiriir qeybta waxbarashada Gaarka ah

(Telefoonka) 614-466-2650

(Telefoonka Lacag la'aan ah) 877-644-6338

(Fakiska) 614-728-1097 25 S. Front Street,
Mail Stop 409 Columbus, Ohio 43215

**Exceptionalchildren@education.ohio.gov**

wacayaasha isticmaalaya teletypewriter (TTY), fadlan soo wac Adeega soo Gudbinta Ohio (800) 750-0750.

Kala xiriir Macluumaadka Dheeraadka ah**http://bit.ly/2hgiNa1**

## Hordhaca Buugga Tilmaanta Xuquuqda Waalidka

Xeerka Waxbarasha Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA) wuxuu dhowraa xuquuqda ardayda naafada ah iyo xuquuqda waalidkood. Timaamtan wuxuu kuu sheegayaa xuquuqdaan. Dugsigaaga waa inuu sanad kasta ku siiyaa nuqul ka mid ah tilmaamatan haddii ilmahaagu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah. Sidoo kale waa in aad heshaa nuqul ka mid ah:

- Haddii aad codsato in ilmahaaga la qiimeeyo sababtoo ah waxaad u maleeynaysaa in ilmahaagu naafo yahay;
- Haddii dugsiga degmadaada ayaa doonaya in ilmahaaga la qiimeeyo sababoo ah waxay u maleeynayaan in ilmahaagu naafo yahay;
- Haddii aad u soo gudbisay (gudbiso) *cabasho* - qoraal ah - Xafiiska Caruurta Gaarka ah ee Waaxda Waxbarashada Ohio, oo taasina ay ahayd *cabashadaada koowaad* ee sanad dugsiyeedka;
- Haddii aad u soo gudbisid (gudbiso) codsi - qoraala - Xafiiska Caruurta Gaarka ah ee Waaxda Waxbarashada Ohio la xariira *nidaamka dhagaysiga dacwada xuquuq dhowrka* oo ku saabsan waxbarashada ilmahaaga, oo ay tahay markii ugu horeysay ee sanad dugsiyeedka aad codsatay mid;
- Haddii ilmahaaga *looga saaray dugsiga sababo anshax (dabeecada) la xariira* - oo ilmahaada horey looga saaray dugsiga muddo 10 maalmood ama ka badan inta lagu jiro sanad dugsiyeedka hadda socda; ama
- Waqti kasta ***oo aad codsato*** *nuqul ka mid ah tilmaamaha*.



## Shaxda Tusmada

**Xogta Guud** .......... 5

Ka Warqabka Oggolaanshaha Waalidka
Ilmahaagu ma u Qalmaa Waxbarasahda Gaarka? Qiimeynta Waxbarashada ee Madaxabannaan
Ogaysiiska Qoraalka Hore

**Diiwaanadda Waxbarashada** .......... 10

Helitaanka Diiwaanadda

**Xallinta Qilaafka** .......... 12

Nidaamka Xallinta Qilaafka
Xallinta Hore ee Cabashada
U fududeeynta
Dhexdhexaadinta
Habka Gudbinta Cabashada ee Gobolka
Nidaamka Waxkaqabka Cabashada ee Gobolka
Soo Gudbinta Cabashada Habraaca Cadaaladeed
Habraaca Cadaaladadeed Waqtiga iyo Geeddi-socodka
Habraaca Xallinta Cadaaladadeed
Habraaca Dhagaysiga Dacwada
Racfaan ka qaadashada Go'aanka
Xaalada Ilmaha inta lagu guda jiro Habraaca Cadaalada
Kharashka Qareenka

**Anshaxa** .......... 29

Nidaamka Anshaxa Carruurta Naafada ah
Go'aanka Qiimeynta Habka
Goobta Waxbarista Kale ee Ku meelgaarka

**Ku meeleeynta Carruurta Naafada ah Waalidiinta Dugsiga Gaar ah ee Kharashka Dadweynaha** .......... 32

Howsha Go'aaminta Celinta

**Wargalinta Waalidka Barnaamijyada Deeqda Waxabarsho ee Carruurta Naafada** .......... 33

Goorta ay Wargelintu Dhacdo

# Macluumaadka Guud

## Oggolaanshaha Waalidka ee Wargashan

Ogolaanshaha waalidka wargashani waxay ka dhigan tahay in adiga iyo/ama waalidka beddelka ee Degmada magacoowday uu fasax qoraal ah siiyay, dugsiga Degmada inuu qaado talaabo. Fasaxaadaadu waxay sidoo kale ka dhigan tahay inay Degmada ku siisay warbixin ku saabsan hawsha la soo jeediyay. Dugsiga degmada ilmahaaga waa inay ka haystaan fasaxaan adiga, isagoo qoraal ah, si loo sameeyo waxyaabaha gaarka ah ee la xiriira waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga. Dugsiga degmada waa in uu helaa ogolaansho qoraal ah:

- Ka hor inta Degmada aanay qiimeeyaan ilmahaaga marka ugu horeysay si loo ogaado haddii ilmahaagu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira;
- Ka hor inta aanay Degmada u bilaabin ilmahaaga in la siiyo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ku qoran barnaamijkiisa isaga ama iyada ugu horeya ee waxbarashada shaqsiyeedka, oo sido kale loo yaqaan IEP;
- Ka hor inta aanay Degmada dib u qiimeeyaan ilmahaaga si loo ogaato haddii uu ilmahaagu u baahan yahay wax ka beddelaad;
- Ka hor inta aanay Degmada ku sameyn qiimeynta dheeraadka ah ilmahaaga. Tusaale waxaa noqon kara Qiimeynta Dabciga;
- Ka hor inta aanay Degmada beddelin meelaynta waxbarasho ee ilmahaaga. Tani ma aha inay ka dhigan tahay isbedelka goobta. Laakiin, waxay ka dhigan tahay isbedelka barnaamijka waxbarasho ee ilmahaaga; iyo
- Ka hor inta aanay Degmada siin macluumaadka ku saabsan ilmahaaga qof aan ahayn kuwa ku xusan sharciga gobolka ama federaalka.

**Waa maxay waalidka ku meel gaarka?**

**Waalidka ku meelgaarka ah waa shakhsi laga yaabaa inuu wakiil uga noqdo ilmaha naafada ah dhammaan arrimaha la xiriira u qalmitaanka iyo helitaanka adeegyada waxbarashada gaarka ah.**

**Dugsiga degmada aad ku nooshahay ayaa u magacaabaya waalid ku meel gaadha markasta oo waxyaabahaan soo socda dhacaan:**

- **Waalidka aan la aqoonsan karin;**
- **Dugsiga degmada, ka dib markii dadaal macquul ay sameeyeen, ay heli kari waayaan waalidka;**
- **Ilmuhu uu yahay cidlaawe dhalinyaro ah; ama**
- **Ilmuhu uu ku jiro maganta gobolka.**

### Oggolaanshaha Waalidka Wargashan Looma Baahna Marka Waxyaabahaan Soo Socda Dhacaan:

- Marka ay Degmada ay dib u eegayaan macluumaadka ardayga ee hadda jira iyadoo qeyb ka ah geeddi-socodka qiimeynta/dib u Qiimeynta; ama
- Marka Degmada ay ku sameeyso qiimeyn ilmahaaga lagu wada sameeyo dhamaan ardayda.



**Si aad u sii Oggolaanshahaada Waalidka Warqaba, Degmada:**

- Waa inaad hubsataa inaad isticmaasho afkaada hooyo, ama nooc kale oo isgaarsiina oo aad fahamayso, si ay kuu siiyaan dhammaan macluumaadka aad u baahan tahay si aad go'aan u gaarto.
- Waa inaad hubsataa in aad fahamto oo aad waafaqday si qoraal ah si ay degmada u fuliyaan hawlaha iyo ogolaanshahaaga sharaxayaa waxqabadka, iyo sidoo kale wixii ka mid ah diiwaanada ilmahaaga ee lala wadaagi doonaa dadka kale iyo cidda loo ogol yahay in lala wadaago,
- Waa in aad hubisto in aad fahantay inaad ogolaanshaha u bixinayso si ikhtiyaariyadaada ku gaarka ah oo aad wax ka beddeli karto maskaxdaada waqtigii aad doonto;
- Waa inaad hubisaa inaad fahmto in haddii aad ka noqoto ogolaanshahaaga, inaysan Degmada ku qasbanayn inay dib uga noqdaan tallaabo kasta oo ay qaadeen intii u dhaxaysa waqtigii aad siisay ogolaansho iyo wakhtigii aad dib uga noqotay.

## Ka noqoshada Oggolaanshaha

Ka noqoshada ogolaanshadu waxay ka dhigan tahay in aad la noqotay ogolaanshahaadii. Waxaad la laaban karta ogolaashahaaga waqti kasta haddii aad go'aansato in aadan mar dambe doonayn inuu ilmahaagu u helo adeegyada waxbarashada gaarka ah sida ku qeexan IEP ilmahaaga. Waa inaad midaas u samaysa ***qoraal ahaan***.

Markaas, dugsiga degmadaada:

- Waa inay joojiso bixinta adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga ee IEP, laakiin ka hor inta aanay joojin bixinta adeegyada, Degmada waa in ay ku siiyaan qoraal ah in la joojinayo adeegyada. Ogeysiinta degmada ku siinayso waxaa la yiraahdaa ogeysiinta hore ee qoraalka. Ogeysiintaan hore ee qoraalka ah waa in ay soo buuxisaa shuruudaha ku xusan qeybta Ogeysiinta Qoraalka Hore ee bogga 9  ee buugan tilmaamaha.

Marka degmada ku siiso ogeysiintan qoraalka hore ah oo sheegaysa in aysan mar dambe siin doonin adeegyada waxbarashada gaarka ah ilmahaaga oo adeegyadana la joojiyo, Degmada uma ay sii araki doonto in ilmahaagu u qalmo waxbarashada gaarka ah iyo waxay u tixgelin doonaan ilmahaaga inuu yahay arday waxbarashada guuda.



## Ilmahaadu Ma u Qalmaa Waxbarashada Gaarka ah?

Xaq u yeelashadu waxay ka dhigan tahay in ilmahaaga la ogaaday inuu u baahan yahay adeegyo waxbarasho gaar ah, sababtoo ah wuxuu leeyahay naafo mid ama ka badan ah. Xeerka Waxbarasha Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA) wuxuu u baahan yahay in ardayda naafada ah ay helaan waxbarashada gaarka ah iyo/ama adeegyada la xiriira. Si loogu tixgeliyo ardayga naafada ah sida xeerka sharcigan , ilmahaagu waa in u baahanyahay waxbarashada gaarka ah iyo/ama adeegyada la xiriira sababta oo ah naafonimada isaga ama iyada heysa mid ama ka badan qaybaha naafanimada soo socda:

- Naafada xagga caqliga ah;
- Dhibaatada maqalka;
- Dhibaatooyinka Hadalka ama Luuqadda;
- Dhibaatada araga;
- Dhibaatada Dareenka,
- Dhantaalnaanta Lafaha;
- Dhakaakaha;
- Dhaawac ba'an oo maskaxda;
- Dhantaalnaanta kale ee caafimaad;
- Naafonimo waxbarasho gaar ah;
- Dhago la'aan;
- Dhago iyo indho la'aan,
- Naafanimo dhowr ah; ama
- Soo daahitaanka kobaca.

**Luuqadaada hooyo ama Nooc kale oo Isgaarsiinta**

**Dhammaan shirarka aad ka qayb gasho, Qiimeynta ilmahaaga iyo dhamaan ogeysiisyada aad hesho waa in lagu qoro ama ku hadlayaan afkaaga hooyo ama habkii kale ee aad isticmaasho.**

**Dhammaan baaritaanada iyo qalabka kale ee loo isticmaalo in lagu qiimeeyo ilmahaaga waa inuu ahaada luuqada hooyo ee ilmahaaga - ama wixii kale ee isgaarsiina ee degmada siin kara macluumaad sax ah oo ku saabsan waxa uu ilmahaagu yaqaan oo tacliin ahaan u samayn karo, horumarka iyo qoralka, haddii aanay si cad u ahayn suuragal in ay bixiyaan ama la maamulo.**

### Weydii degmada si ay u qiimeyso ilmahaaga

Haddii aad u maleeynayso in ilmahaagu qabo naafonimo saamaynaysa waxbarashadiisa, waxaad ka codsan kartaa degmada inay qiimeeyaan ilmahaaga si loo ogaado in uu isagu ama iyadu u qalmo waxbarashada gaarka ah (loo arki inuu yahay ilmo naafo ah sida hoos timaad qeexida IDEA). Dugsiga degmada ayaa sidoo kale ka codsan kara waqti kasta inaad doonayso in ilmahaaga la qiimeeyo haddii ay xubnaha shaqaalaha Degmada u malaynayaan in ilmahaagu u baahan waxbarashada gaarka ah. Si kasta ha ahaate, kadib markii dugsiga Degmada uu helo ogolaanshahaaga (ogolaansho) oo qoraal ah, waa inay ku dhammaystiraan qiimeynta (hore) 60 casho gudahood.

### Haddii Ilmaha kujiro Illaalaynta Gobolka

Haddii ilmuhu uu ***ku jiro illaalaynta gobolka*** oo aanu isaga ama iyada waalidkii la noolayn, dugsiga Degmada uma baahna ogolaashaha waalidka si uu Qiimeynta hore ugu sameeyo si loo ogaado haddii ilmuhu yahay ilmo naafo ka ah xaaladahan soo socda:

- Haddii, inkastoo dadaal macquul ah la sameeyay, hadana uu dugsiga degmada u heli kari waayay waalidka ilmaha;
- Xuquuqda waalidka la joojiyey; ama
- Xuquuqda waalidka uu u xilsaaray garsoore qof kale kuwaas oo raalli ka ah in la qabto Qiimeynta hore.

## Qiimeynta Waxbarashada ee Madaxbannaan (IEE)

Qiimeynta wabarashada xorta (IEE) ayaa sidoo kale waxaa loo yaqaan Qiimeynta ka baxsan. Dugsiga degmada ayaa bixin doonta qiimeyntan xorta ah ee ka baxsan kaliya haddii ay hore u sameeyeen qiimeyntooda u gaarka ah ee ilmahaaga oo aad waxa ay Degmada ku sheegtay aadan ku raacsanayn. Ujeedada waxay tahay si loo ogaado haddii ilmahaagu u baahan yahay waxbarasho gaar ah, ama inuu u sii baahan yahay waxbarashada gaarka ah. Qofka ku qiimeeynaya ilmahaaga qiimeynta ka baxsan degmada kama shaqeyn karaan dugsiga degmada ee ilmahaaga. Adigu waxaad, waalid ahaan xaq u leedahay, mar kasta, inaad soo diyaariso iyo bixiso Qiimeynta xorta ee ilmahaaga. Marka aad khilaafsan tahay qiimeynta degmada ee ilmahaaga oo aad weydiisato qiimeyn xorta ah oo ka baxsan midooda, degmadaadu waa in ay qaadan mid ka mid ah tallaabooyinkan iyadoo aan laheyn dib u dhac aan loo baahnayn:


- Dugsiga Degmada waa inay kuu sheegaan halka aad ka heli karto qiimeynta ka baxsan midooda ee ilmahaaga oo ku gaara iyo kugu wargeliyaan shuruudaha lagama maarmaanka u ah degmada si ay u bixiso. Marka degmada ogolaado oo aad soo hesho qiimeynta ka baxsan midooda, Degmada waa in ay bixiyaan kharashka; ama
- Degmada waa inay u soo gudbiyaan codsi Waaxda Ohio ee Xafiiska Waxbarashada Caruurta Gaarka ah dacwada dhagaysiga nidaamka(eeg bogga 21) maxaa yeelay waxa ay diidan yihiin codsigaaga qiimeynta ka baxsan midooda. Tani waxay noqon kartaa, marka ay Degmada aaminsan tahay in qiimeyntooda gaarka ah ee ilmahaaga ay tahay mida ku haboon.

### Shuruudaha Qiimeynta Xorta

Waa shuruudo la midka kuwa quseeya Qiimeynta Degmada ay qabato waxaanay ay sidoo kale quseeyaan Qiimeynta dibadda ee ay waalidiintu soodiyaariyaan ee ay Degmada bixiso. Shuruudaha waxaa ka mid ah halka ilmahaagu u tagayo qiimeynta iyo waayo-aragnimada qofka baarayaa ilmahaaga. Degmada waa in ay bixiso qiimaha buuxa ee qiimeynta dibadda ee soo buuxiyey sharuudaha degmada.

Haddii aad codsato qiimeynta dibadda ee ilmahaaga, Degmada waxaa laga yaabaa inay ku weydiiso ***sababta*** aad u diidan tahay Qiimeynta degmada ee ilmahaaga (taasi inay tahay, sababaha aad u rabto qiimeynta dibadda), laakiin qasab ma aha in aad taas u sharaxdid haddii aad doonayso inaad sidaas sameeyso. Waxa kaliya ee aad xaq u leedahay hal mar oo qiimeynta dibadda oo ay bixinayso degmada, mar kasta oo Degmada qiimeeyso ilmahaaga oo natiijooyinka Qiimeynta degmada aadan ku raacsanayn. Marka ilmahaagu helo qiimeynta dibadda oo buuixneysa shuruudaha degmada, iyadoo aan loo eegin cidda bixisay, Degmada waa inay qaddarisaa natiijooyinka Qiimeynta iyo ka fiirsataa sidii ay u siin lahayd ilmahaaga waxbarashada bilaashka ah ee ku haboon dadweynaha (FAPE).

**Shaxda soo socota waxay muujinaysaa Dhacdooyinka Kala duwan ee dhaca marka aad codsato Qiimeynta Dibadda**



## Ogeysiiska Hore ee Qoraalka

### Guudmarka

Dugsiga degmada waa inuu ku siiyaa ogeysiis qoraal ah oo la yiraahdo (ogeysiiska hore ee qoraalka) waqti macquul ah gudahiis ka hor inta aysan wax ka qaban ama aysan ku diidin inay qaadaan tallaabooyinka gaarkood. Falalkaas waxaa ka mid ah inta aanay Degmada bilaabin ama wax ka beddelin aqoonsiga, Qiimeynta ama meelaynta waxbarasho ee ilmahaaga ama siinta waxbarashada dadweynaha ee bilaashka ah ilmahaaga. Ogaysiiska hore ee qoraalka waa foon waxbarashada gaarka ah looga baahan yahay.

### Tusmada Ogeysiiska Qoraalka Hore

Ogeysiiska hore ee qoraalka ah waa inuu ku siiyo faahfaahin kugu filan si uu ku oggolaado inaad uga qayb qaadato go'aamada adeegyada waxbarasho ee ilmahaaga si xogogaal ah. Gaar ahaan, ogeysiiska hore ee qoraalka ah waa inay ku jiraan waxyaabaha qaarkood, sida ku cad sanduuqa soo socda ee bogaan.

### Ogaysiiska Hore ee Qoraalka waa inuu ku qoraanada Luqad la Fahmi Karo

Ogaysiiska hore ee qoraalka ah waa in lagu bixiyaa luqad ay fahmi karaan dadweynaha guud iyo sidoo kale waa in lagu soo qoraa luqadaada hooyo ama hab kale oo isgaarsiina haddii aanay si cad u muuqan inaysan maquul ahayn in sidaas la sameeyo.

Haddii afka hooyo ee waalidka ama qaabka kale ee xiriirka ***aysan ahayn*** luqad qoran, markaas degmada waxaa looga baahan yahay in ay qaadaan tallaabooyin ay hadal ugu turjumayaan ogeysiiska hore ee qoraalka ah, ama hab kale oo la fahmi karo, oo ah afka hooyo ee waalidka ama nidaamyadda kale ee xidhiidhka. Degmada waxay u baahan doontaa inay hubiyaan inay u muujin karaan, qoraal ahaan, in ogaysiiska hore ee qoraalka loo tarjumay si haboon oo waalidku ay fahami karaan waxa ku qoran.

**Ogeysiiska Hore ee Qoraalka ah Waa inay ku jiraan:**

- **Sharaxaad ku saabsan hawsha la soo jeediyay ama ay diiday degmada;**
- **Sharaxaad sababta ay Degmada u soo jeedinayso ama ay u diidayso in ay tallaabo qaaddo;**
- **Faahfaahinta hanaanka qiimeyn kasta, qiyaasta, diiwaanka ama warbixinta dugsiga uu isticmaalay si ay u sameeyaan go'aanka;**
- **War qoraal ah oo u sheegaya waalidiintu inay leeyihiin xeerka ilaalinta dhowritaanka nidaameed IDEA,iyo haddii ogeysiiska uusan ahayn qiimeynta u diritaanka hore ah, hab kaas oo ay waalidku ka heli karaan sharaxaada nidaamka dhowritaanka;**
- **Ilaha ay waalidku kala xidhiidhi kaaraan si ay u helaan kaalmada fahamka shuruudaha IDEA;**
- **Sharaxaada fursadaha kale ee ay kooxda IEP tixgeliyeeniyo sababaha ay fursadahaasi u diideen;**
- **Sharaxaada qodobbada kale eela xiriira soo jeedinta ama diidmada degmada.**



# Diiwaannada Waxbarashada

## Helitaanka Diiwaannada

Xeerka Xuquuqda Waxbarasho ee Qoyska iyo Asturnaanta (FERPA) waa sharci federaal ah oo siinaya waalidiinta xuquuq gaar ah oo ay ku baaraan iyo dib ugu eegaan diiwaanada waxbarashada carruurtooda. Xuquuqda hoos timaada FERPA waxa u kala wareegta waalidka iyo ardayga marka ardayga uu gaaro 18 sanno jir ama uu bilaabo inuu dhigto waxbarashada ka dambeysa dugsiga sare (tusaale ahaan, kulliyad ama jaamacad), midkii soo hor mara.

### Waa Maxay Diiwaannada Waxbarashada?

Haddii macluumaad gaar ah oo ku saabsan oo ardayga badbaadinayso FERPA waxay hadba ku xiran tahay sida uu u soo buuxiyo macnaha diiwaanka waxbarasho. FERPA waxay ku qeexdaa diiwaanka waxbarashada inuu yahay:

1. Diiwaannada sida tooska ah ula xariira arday gaar ah. Mararka qaarkood dugsiyada waxay ugu yeedhaan midaan macluumaadka shaqsiga lagu garan karo; iyo
2. Diiwaannada in lagu hayo hay'ad waxbarasho ama machad (tusaale ahaan, dugsiga degmadaada) ama Koox matalaysa hay'adaas.

### Dayactirka iyo Asturnaanta Diiwaannada

Diiwaanadda waxbarashada waxaa laga yaabaa in loo hayo siyaabo badan. Tusaale ahaan waa:

- Iyagoo gacanta lagu qoray;
- Daabacan;
- Kombuyuuterka;
- Cajalad muuqaal ama maqal ah; ama

Filin, microfilm ama microfiche.Diiwaanada ardayda waa qarsoodi, taasoo ka maco ah inay yihiin kuwa gaarka ah. Dugsiga Degmada ama hay'adda waa inay ilaaliyaan asturnaanta diiwaanada ilmahaaga marka ay ururiyaan, keydinayaan, bixinayaan ama wada baabbi'inayaan.

### Dib u eegida Diiwaannada Ilmahaaga

Dugsiga Degmada waa inay ku oggolaadaan in aad dib eegto diiwaanka waxbarashada ilmahaaga iyadoon laheyn wax daahitaan ah oo aan loo baahneyn iyo ka hor kulanka kasta oo kooxda IEP ama wixii dacwado nidaam dhowrista ah ee aad ku lug leedahay. Degmada ma sugi karaan wax ka badan 45 maalmood laga bilaabo taariikhda codsigaaga si ay kugu oggolaadaan in aad u eegto diiwaanada.

Waxaad xaq u leedahay inaad dib u eegto macluumaadka diiwaanka ku saabsan ***ilmahaaga*** oo kaliya. Waxaad xaq u leedahay in aad weydiisato dugsiga sharaxaada diiwaanka ilmahaaga. Waxaad xaq u leedahay in qof kale, kaasoo oo adiga ku matalaya, uu baari diiwaanka (sida saaxiibka ama qareen).

Degmada waxay ku siin karaa nuqulo ka mid diiwaanada ilmahaaga; si kastaba ha ahaatee ***waa inay*** Degmada ku siisaa nuqul haddii ku guuldaraysashada sidaas in la sameeyo ay kaa hor istaagayso xuquuqda aad ku eegi lahayd diiwaanada. Waxaad mar walba xaq u leedahay inaad hesho nuqulo ka mid diiwaanada adigo kharashka bixinaya.

**Macluumaadka Shaqsiga Lagu Garan Waxaa ka mid ah:**

- Magaca ilmahaaga;
- Magaca Xubnaha qoyskaaga;
- Ciwaanka ilmahaaga ama ciwaanka qoyska;
- Aoonsiga shakhsiyeed, sida lambarka amniga bulshada, lambarka ardayga ee ilmahaaga ama diiwaanka jismiyeed,
- Siyaabaha kale ee aan tooska ahayn ee aqoonsashada ilmahaaga, sida taariikhda dhalashada, meesha uu ku dhashay, magaca hooyadiis, jinsiyada ama qowmiyadda; Macluumaadka kale, ee kaligii ama marka wax lagu daro, lagu xariiryo ama aan lala xariirin arday gaar ah oo u oggolaan kara qof macquul ah oo bulshada dugsiga, oo aan u lahayn aqoon shakhsi ahaaneed xaaladaha la xariira, uu ugu aqoonsan karo ardayga si hubsiimo macquula;
- Macluumaadka uu codsaday qof dugsiga uu aaminsan yahay inuu haysato aqoonta aqoonsiga ilmahaaga; ama
- Tusaalayaasha kale sida lagu qeexay FERPA.



## Isbedelada Diiwaannada Waxbarashada

Waxaad xaq u leedahay in aad weydiisato dugsiga degmada inay bedelaan macluumaadka qaldan ama marin-habaabsan ee ku qoran diiwaanka waxbarashada ilmahaaga. Dugsiga ilmahaagu qasab kuma aha in ay wax ka beddelaan diiwaanka waxbarashada iyadoo la raacayo codsigaaga (kaliya sababtoo ah adigaa weydiistay), laakiin dugsigu waa inuu ***tixgeliya*** codsigaaga. Haddii dugsigu go'aansado in aanay wax uga beddelin diiwaanka ilmahaaga sida aad u weydiisatay, dugsigu waa inuu ku sheego inaad xaq u leedahay dhageysiga dacwada si aad uga hadasho arrinta.

Kadib dhageysiga, haddii dugsiga weli go'aansado in aan wax laga beddelin diiwaanka waxbarasho, waxaad xaq u leedahay inaad ku darto bayaanka qoraalka arrinta diiwaanka ilmahaaga. Bayaankaaasna waa inuu qayb ka ahaada diiwaanka ilmahaaga. Fursada ah inaad qorto waraaq si aad ugu darto diiwaanka ilmahaaga waxay jirta oo ***keliya haddii diiwaanka ay ku jiraan macluumaad qalad ah.*** Uma aad isticmaali kartid warka noocan oo kale ah si aad uga doodo darajada fasalka ilmahaagu helay, fikrad shakhsi ah ama go'aan dhab oo uu gaaray dugsiga oo ku saabsan ilmahaaga .

## Wadaagida Diiwaanada Waxbarashada

Sida caadiga ah, dugsiga Degmada waa inuu helaa ogolaansho qoraal ah haddii ay doonayaan in ay la wadaagaan diiwaanka waxbarashada lagu garan karo ilmahaaga qof kale oo aan adiga ahayn. Hase ahaatee, waxaa jira mararka qaarkood inaan fasaxaada loo baahnayn. Si aad wax badan oo ku saabsan goorta ***aysan*** degmaddu u baahnayn ogolaanshahaada oo qoraal ah si ay u wadaagaan diiwaanadda u ogaato, eeg **tilmaamaha guud ee FERPA ee waalidiinta** Maraykanka. Bogga internetka ee Wasaarada waxbarashada **www.ed.gov**,



# Xallinta Khilaafka

## Geeddi-socodka lagu Xalliyo Khilaafaadka

Haddii aad ka welwelsan tahay waxbarashada ilmahaaga naafada ah, tallaabada ugu horreysa waa inaad la shaqeeyso dugsiga degmadaada. Si aad u biloowdo, la xiriir macallinka ardayga ama agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee degmadaada. Qofka u sheeg waxa aad ka fikirayso. Haddii adiga iyo Degmada aadan isku af garantaaan waxyaabaha ku saabsan cabashadaada, waxaa jira siyaabo aad uga wada shaqayn karaan xallinta dhibaatada.

Geeddi socodka howshu waxay leeyahay magacyo rasmi ah oo dugsiga degmadaadu u isticmaali karo, laakiin tilmaamahaan ayaa kaa idinka caawin doona inaad fahamto waxa magacyadaas macnahoodu yahay iyo sida adiga iyo dugsigu aad u caawin kartaan ilmahaaga. Qeybtaan soo socda ayaa qeexaysa geeddi socodka ama hababka aad isticmaali karto si aad degmada ula shaqeeyso.

**Dib u eegista Maamulka**

Haddii aadan raali ku ahayn go'aanka dugsiga degmada ee ku saabsan waxbarashada ilmahaaga naafada ah, waxaad cabasho u gudbin kartaa maamulka degmada. Iyada oo laga jawaabayo, ayaa kormeeraha degmadaada (ama qof uu u xil saaray) wuxuu samayn doona dib u eegista maamulka. Dib u eegistan waxay ka mid noqon kara dhageysiga dacwada maamulka.

Dib u eegis iyo dhageysiga maamuleed, haddii mid la qabto, waa in lagu qabto waqti iyo goob u sahlan dhamaanba ka qayb-galayaasha loo baahan yahay. Labadiina adiga iyo Degmadaba waa u yeeri kartaan dadka kale inay ka soo qayb galaan dib u eegis ama dhagaysiga maamuleed. Tusaale ahaan, waxaad u yeedhi kartaa xubnaha kale ee qoyska ama saaxiib, qof aqoon u leh waxyaabaha ku saabsan waxbarashada gaarka ah, ama qareen. Haddii ilmahaada uu wax ka barto barnaamij ay maamulaan guddiga gobolka ee naafada ama hay'ad kale oo waxbarashada dadweynaha, Degmada waa inay kala tashataa guddiga ama hay'adaas dib u eegis maamuleed.

In dib loo eegayo xaaladda, dadaal kasta waa in la sameeyaa si loo xaliyo khilaafka ku saabsan waxbarashada ilmahaaga. Kormeeraha (ama qof uu u xil saaray) ayaa maqli doona labada dhinac ee khilaafsan iyo go'aan gaari doona. Marka go'aan la gaaro, kormeerahu waa inuu kugu soo sheegaa, si qoraal ah, go'aanka. Tani waa inay dhacdo 20 casho gudahood marka ugu horeysa ee aad ogeysiisay degmada waxyaabaha ku saabsan cabashadaada.

Habsocodyo dheeraada oo Aad Isku dayi KartoHaddii aad dhammaysay nidaamkan oo adiga iyo dugsiga Degmada weli aadan ku wada heshiin sida loo xaliyo dhibaatada, waxaa jira geeddi socodyo kale oo aad isku dayi karto. Inkasta oo aan lagaaga baahanayn inaad codsato dib u eegista maamulka ka hor inta aadan u gudbin hab kale oo xalinta khilaafaadka, hadana waa lagugu dhiirigelinayaa. Waxaa jira fursado dheeraad ah oo aad isticmaali karto si loo xaliyo dhibaatada Waaxda Ohio ee Xafiiska Waxbarashada Caruurta Gaarka ah ayaa ka qayb qaadan kara iyo ku caawin kara codsigaaga qalab dheeraad ah si ay u xalliyaan khilaafka. Hay'adahaan soo socda ayaa sidoo kale ku caawin kara:

- Kooxda Taageerada Gobolka ee Degaankaada (Gobolka #______________) (Telefoon # ____________________________). Waalidka iyo la taliyaha qoyska ee Kooxda Taageerada Gobolka ayaa wada shaqayn doonaa.
- Caawiyaha waalidka ee maxaliga ah, haddii dugsiga Degmada uu leeyahay mid.
  - Caawiyaha waalidku wuxuu siiya macluumaad iyo taagyeero qoysaska leh carruurta naafada iyo dugsiyada degmooyinka. Caawiyaha waalidka waa shaqaalaha degmadda iyo sidoo kale waa waalidka leh ilmo naafo ah.
  - Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir ___________________________________________________.
- Isbahaysiga Ohio ee Waxbarashada Caruurta Naafada ah (OCECD)
  - OCECD waa urur aan faa'iido doon aheyn oo gobolka oo dhana oo u adeega qoysaska haysta dhalaanka, socod baradka, carruurta iyo dhallinyarada naafada ah ee Ohio, iyo barayaasha iyo hay'adaha siiya adeegyada iyaga. Barnaamijyada OCECD ayaa ka caawiya waalidiinta si ay ugu noqdaan wakiillo wargashan oo wax ku ool ah carruurtooda dhamaanba goobaha waxbarashada.
  - Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xiriir OCECD (740) 382-5452 ama booqo bogga internetka ee OCECD: www.ocecd.org.

## Xallinta Hore ee Cabashada

Xalinta hore ee cabashada waa marka aad isku daydo inaad kula xaliso khilaafaadka dugsiga degmada si aan rasmi ahayn oo caadi ahaan ah ka hor inta aanad bilaabin isticmaalka fursadaha kale ee xalinta khilaafaadka. Qof ka socda Waaxda Ohio ee Xafiiska Waxbarashada Caruurta Gaarka ah ayaa kaala shaqayn doona si uu kaaga caawiyo sidii wax looga qaban lahaa su'aalaha aad qabtid iyo walaac ku saabsan waxbarashada ilmahaaga.

Waaxda Waxbarashada ee Ohio waxay kugu dhiirigalinaysaa xalinta hore ee cabashada ka hor inta aadan codsan habka rasmi ah oo kale, sida cabashooyinka qoraal ah ama dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista. Waxaad la xiriiri kartaa qof ka socda Waaxda Ohio ee Xafiiska Waxbarashada Caruurta Gaarka ah si ay kaga caawiyaan sidii wax looga qaban lahaa su'aalaha aad qabto iyo walaac ku saabsan waxbarashada ilmahaaga. Si aad ugala hadasho qof xalinta hore ee cabashada, fadlan kala xiriir Waaxda:

- Telefoonka: (614) 466-2650, ama qadka bilaashka ah ee (877) 644-6338;
- Email ka ah: exceptionalchildren@education.ohio.gov.

## Fududeynta

Haddii aad ka welwelsan tahay Qiimeynta ama dib u Qiimeynta ilmahaaga ee waxbarashada gaarka ah, ama wax ku saabsan ilmahaaga Barnaamijkiisa Waxbarashada Shaqsiga (IEP), doorashada lagu magacaabo fududeynta ay ku anfaci karta.

Fududeynta waa marka aad weydiisato Waaxda si loo diyaariyo fududeeye inuu ka qayb galo shirka Qiimeynta ilmahaaga ama kooxda IEP (Adiguna waxa aad tahay xubin ka mid ah kooxdaas). Dugsiga degmada ayaa iyaguna sidoo kale sameyn kara codsi ah in Waaxda u soo dirto fududeeye kulamadaasi ku lug leh waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga. Adiga iyo Degmada waa inaad isku raacsan tihiin inuu goob-jooge ka ahaado kulanka fududeeye.

### Ujeedada Fududeeynta

Fududaynta waxay ka dhacdaa kulanka kooxda, sida shirka kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiyeed, kulanka qorshaynta Qiimeynta ama kulanka kooxda Qiimeynta. Fududeeyuhu waa dhexdhexaad, dhinac saddexaada oo aan ahayn xubin ka mid ah kooxda oo aan sameyn go'aanka kooxda. Lahaanshaha fududeeyahu waxay ka caawisaa kooxda inay noqoto mid wax ku ool ah oo diirada saarta ardayga. Fududeeyahu waa xirfadlayda dhex dhexaadinta kuwaas oo loogu soo tababaray Xafiiska Caruurta Gaarka ah geeddi socodka waxbarashada gaarka ah.

Waxaad codsan kartaa waqti kasta fududeynta. Marka aad codsato, adiga iyo dugsiga degmada labadiinaba waa inaad ku heshiisaan inaad ka soo qayb gashaan. Haddii aad isku raacdaan labadiina, Xafiiska Caruurta Gaarka ah ayaa idin siin doonaa doorashooyinka fududeeyaha si uu u maamulo kulanka. Haddii adiga iyo Degmada aad ku heshiin weeydaan fududeeye, xafiiska ayaa mid idiin xuli doona. Ma jiro wax kharash ah oo adiga ama Degmada aad ku bixinaysaan fududaynta.

**Fududeeyaha:**

- Ahaan doonaa dhinac saddexaad oo dhexdhexaad ah (ma raaci doono dhinaca ama uma shaqeeyo adiga ama degmada);
- Waa xirfadle u tababaran ***dhexdhexaadinta*** (qof khibrad u leh inuu bixiyo caawinaada xalinta khilaafaadka);
- Waxaa loo tababaray oo uu yaqaana sharciyada iyo shuruudaha khuseeya waxbarashada gaar ah;
- Kamana tirsana kooxda IEP ama qiimeynta ilmahaaga;
- Go'aano ma gaaro, laakiin wuxuu u tilmaama kooxda sidii xal loo heli lahaa;
- Wuxuu caawiyaa in la furo wada hadalka u dhaxeeya adiga iyo degmada;
- Ilaaliyaa kulanka inuu u socdo sidii loogu talogalay iyo caawiyaa inuu qof waliba ixtiraamo hab socodka howsha; iyo
- Wuxuu ilaaliyaa in kooxdu xooga saarto ilmahaaga iyo baahida ilmahaaga.



**Qodobbada Muhiimka ah ee laga Xusuusnaado Fududeynta:**

- **Fududeynta waa ikhtiyaari.**
  - Labadaba waalidka iyo dugsiga Degmada waa in ay ku heshiiyaan in ay qayb ka noqdaan geeddi-socodka. Haddii waalidka iyo Degmada ay ku heshiiyaan inay helaan fududeeyaha kulan, tani micnaheedu ma aha in aad ku raacsan tahay degmada kulanka ama inaad ogolaatay waxa kulanka ka soo baxay. Waalidiinta waxaa mar walba loo oggol yahay in ay leeyihiin fikrado iyaga u gaar ah
- **Heshiis kasta oo la sameeyo inta lagu guda jiro kulanka fududeynta ah guud ahaan waa mid dhab ah. Taas macnaheedu waa in labadaba waalidka iyo dugsiga Degmada raacaan heshiiska ka dib markii go'aanka la wada aqbalo.**
  - Dukumenti kasta oo waalidka iyo degmada wada saxiixaan oo ku saabsan Qiimeynta ama IEP ilmahaaga wuxuu xanbaarsan yahay miisaan la mid ah sida waraaqaha kale ee aad ku saxiixdaan IEP ama kulanka kooxda Qiimeynta.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fududeynta, booqo bogga internetka Waaxda Waxbarashada Ohio ee ah: education.ohio.gov ***iyo raadi fududeynta.***

### Si aad u Codsato Fududeynta

Kala xiriir agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee dugsiga degmadaada si aad u ogaato haddii ay Degmada diyaar u tahay inay ka qayb qaataan geedi socodkan, ___________________________________ ee_________________________ _____________. Marka labada dhinac ku heshiiyaan in ay ka qayb qaataan fududeynta, fadlan kala xiriir Waaxda Ohio Xafiiskeeda Waxbarashada Caruurta Gaarka ah:

- Telefoonka: (614) 466-2650, ama qadka bilaashka ah (877) 644-6338; ama
- Email-ka ah: exceptionalchildren@education.ohio.gov.

## Dhexdhexaadinta



Dhexdhexaadintu waa marka waalidiinta iyo dugsiga Degmada ku heshiiyaan inay lahaadaan qayb dhex-dhexaad ah, oo saddexaad oo xirfad leh inuu yimaado kulanka si ay uga caawiyaan heshiis ku saabsan waxbarashada ardayga naafada ah ama ardayga lagu ***tuhunsan yahay inuu*** naafo yahay. Dhinac saddexaad waxay macnaheedu yahay in qofkaas, oo sidoo kale loo yaqaan dhexdhexaadiyaha, inuusan raacin dhinac oo uma shaqeeyo ama u dhaqmaan sidii qof wakiil ka ah waalidka ama degmada. Dhexdhexaadintu waa doorasho ay waalidiinta iyo degmooyinka heli karaan waqti kasta oo uu jiro khilaaf ku lug leh waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga.

### Dhexdhexaadintu waa Bilaash oo Waxaa La Codsan Karaa Wakhti Kasta

Dhexdhexaadinta waxaa ka codsan kartaa waqti kasta. Marka dhexdhexaadin la codsado, waa in adiga iyo dugsiga degmada labadiinaba aad ku heshiisaan in aad ka qayb qaataan geedi socodka. Haddii labadiina aad ku heshiisaan in aad ka qayb qaataan, Xafiiska Caruurta Gaarka ah ayaa idin siin doona doorashooyinka dhexdhexaadiye si toos ah shirka u dhexdhexaadiya. Haddii adiga iyo Degmada waa in ay ku heshiin weydaan dhexdhexaadiye, OEC ayaa hal idiin xulli doonta. Dhexdhexaadiyahu kuuma uu sheegi karo sida aad u xaliso arrinta ku lug leh waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga. Laakiin, dhexdhexaadiyahu wuxuu ka caawiyaa labada dhinac sidii ay uga wada hadli lahaayeen walaaca ku lug leh ilmahaaga iyo ugu heli lahaayen xal.

Haddii aad go'aansato in aad samayso cabasho rasmi ah ama codsato dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista (eeg bogga 17-25), Waaxda Waxbarashada Ohio waxay ku weydiisan doonaa inaad u tixgeliso dhexdhexaadinta inat tahay talaabada ugu horeeysa. Ma jiraan wax kharashka ah oo aad ku bixinaysaan adiga ama degmada dhexdhexaadinta.

## Dulmarka Geedi socodka Dhexdhexaadinta

### Codsiga Dhexdhexaadinta

Adiga ama dugsiga degmada ayaa ka codsan kara Waaxda Waxbarashada ee Ohio dhexdhexaadin waqti kasta. Haddii aad soo gudbisid cabasho ama codsato dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista, Waaxda tallaabada ugu horaysay ee ay bixinaysaa waa dhexdhexaadinta. Adiga iyo Degmada waa inaad isku raacsan tihiin in la isticmaalo dhexdhexaadiye.

### Dooro Dhexdhaxaadiye iyo Jadwalka Shirka

Dhexdhexaadiyuhu waa dhinac saddexaad oo dhexdhexaad ah. Adiga iyo dugsiga Degmada waa inaad ku heshiisaan dhexdhexaadiyaha. Dhexdhexaadiyuhu shirka ayuu u qaban doona sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah. Waaxda ayaa bixin doonta kharashka dhexdhexaadiyaha.

### Shirka Dhexdhexaadinta

Adiga iyo dugsiga degmada ayaa ka wada hadli doona walaacaaga. Dhexdhexaadiyaha ayaa kaa caawinaya in aad xalliso khilaafka iyo gaartaan heshiis kama dambeysa, oo qoraal ah. Guud ahaan, wax kasta oo la sheego inta lagu jiro dhexdhexaadinta lalama wadaagi karo meel ka baxsan shirka ama looma isticmaali karo dacwadaha sharciga ah ee mustaqbalka, haddii aysanreebnanayn inta ay khuseeyso.

### Heshiis La gaartay

Heshiiska qoraalka ahna wuxuu qabanaya labadaba waalidka iyo dugsiga degmada waana in la saxiixa. Qabanaya waxaa loola jeeda waalidka iyo dugsigu waa inay raacaan heshiiska iyo maxkamadda ayaa dhaqan gelin karta.

### Heshiis Aan Gaarin

Haddii heshiis aan lagu gaarin dhexdhexaadinta, oo aad u soo gudbiso dacwad gobolka, markaas Xafiiska Carruurta Gaarka ah ayaa xalin doona cabashada. Haddii heshiis aan lagu gaarin dhexdhexaadinta oo aad soo gudbiso dhagaysiga nidaamka xuquuq dhowrista,markaas dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista ayaa la



**Dhexdhexaadiyaha:**

- Yahay dhinac saddexaad oo dhexdhexaad ah (ma raaco dhinac ama uma shaqeeyo adiga ama degmada midna);
- Looma ogola inuu go'aan sameeyo. Beddelkeeda, dhexdhexaadiyaha wuxuu ka caawinayaa adiga iyo dugsiga degmada xallinta arrintan ku lugta leh waxbarashada ilmahaaga;
- Kala shaqeyn doona adiga iyo dugsiga degmada inaad go'aan heshiis qoraal ah oo dhexdhexaadina gaartaan;
- Ilaaliyaa shirka dhexdhexaadinta inuu hayo wadada iyo ka caawiya inuu qof walba dhowro ixtiraamka habka wax u socdaan;
- Ilaaliyaa in qof walba uu diirada saarayo ardayga iyo baahida ardayga;
- Wuxuu caawiyaa furitaanka wada hadalka u dhexeeya adiga iyo dugsiga degmada.

**Qodobbada Muhiimka ah ee la Xusuusnaado Dhexdhexaadinta**

- **Dhexdhexaadintu waa ikhtiyaari.**
  - Labadaba waalidka iyo dugsiga Degmada waa inay ku heshiiyaan in ay ka qayb qaataan geeddi-socodka howsha. Haddii waalidka iyo Degmada ku heshiiyaan in ay ka qayb dhexdhexaadinta, tani micnaheedu ma aha in aad ku raacsan tahay degmada kulanka ama inaad ku heshiisaan waxa kulanka ka soo baxaya.
- **Dhexdhexaadintu waa qarsoodi.**
  - Wax walba oo la sheegay in shirka dhexdhexaadinta lagu jiro guud ahaan weli wey asturanaan doonaan (qarsoodi) oo lama isticmaali karo mar dambe, haddii aanay khusayn ka reebanaan.
- **Heshiis kasta oo qoraal ah oo la sameeyey intii lagu jiray dhexdhexaadinta wuxuu guud ahaan noqonayaa mid rasmi ah. Taasi macnaheedu waa in labadaba waalidka iyo dugsiga Degmada raacaan heshiiska qoraalka ah ka dib markii go'aanka la wada gaaro.**
  - Dukumenti kasta oo waalidka iyo degmada saxiixaan oo ku saabsan Qiimeynta ama IEP ilmahaaga wuxuu xanbaarsan yahay miisaan la mid ah sida waraaqaha kale ee ay ku saxiixaan IEP ama kulanka kooxda Qiimeynta.

### Si aad u Codsato Dhexdhexaadinta

Kala xiriir agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee dugsiga degmadaada si aad u ogaato haddii ay Degmada diyaar u tahay inay ka qayb qaataan geedi socodkan, ________________________________ ee____________________ _______________. Marka labada dhinac ku heshiiyaan in ay ka qayb qaataan dhexdhexaadinta, fadlan kala xiriir Waaxda Ohio Xafiiska Waxbarashada Caruurta Gaarka ah:

- Telefoonka: (614) 466-2650, ama qadka bilaashka ah (877) 644-6338; ama
- Email-ka ah: exceptionalchildren@education.ohio.gov.



## Buuxinta Cabashada Gobolka

Qaabka kale oo aad heli karto, haddii aad qabto wax walaac ah oo ku saabsan waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga, waa inaad cabasho uga samayso gobolka si rasmi ah oo qoraal ah ka soo horjeeda dugsiga degmada ama hay'adaha guud ee kale oo cabashadaas aad u soo gudbisaa Waaxda Waxbarashada Ohio Xafiiskeeda Caruurta Gaarka ah.

### Ma jirto Wax Kharash ah oo ku Baxaya Cabashada Gobolka.

Ma jirto wax kharash ah oo ku baxaya cabashada gobolka. Nidaamka cabashada gobolka guud ahaan wuxuu dhibaatada xal ugu helaa si ka dhaqso badan dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista iyo ka qas yar yahay (ama ka horimaad yar yahay) dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista. Si aad ugu soo gudbisid cabasho gobolka, waa inaad soo saxiixdaa una soo dirtaa, cabasho qoraal ah (nooca asalka ah) Xafiiska Caruurta Gaarka ah, iyo waa inaad ***nuqul*** ka mid ah cabashadaas si toos ah ugu dirto dugsiga degmada.

Cabashadaada waa in ka mid noqotaa cadeyn qoraal ah oo sheegaysa xad gudubka lagu eedeeyay in loo geystay shuruudaha waxbarashada gaarka ah ee federaalka ama gobolka (xadgudub la soo sheegay ee Xeerka Waxbarasha Shaqsiyaadka Naafada ama Heerarka Hawlgalka Ohio ee Waxbarashada Caruurta Naafada ah). Cabashadu uma baahan inaad ku soo darto magac ama ganaax sharci gaar ah, laakiin waxay u baahan tahay inaad sheegto tallaabo gaar ah ama ficil daro ay Degmada qaaday oo aad aaminsan tahay inuu yahay xadgudub loo geystay sharuudaha waxbarashada gaarka ah. Sidoo kale, waa in aad ku soo dartaa xaqiiqooyinka cabashada si ay u taageeraan sababta aad ugu malaynayso in degmada ay ku xadgudbeen shuruudaha waxbarashada gaarka ah.

### Dib u eegista Cabashooyinka Gobolka

Xafiiska Caruurta Gaarka ah ayaa dib u eegi doona iyo, haddii loo baahdo, baaritaan ku samaynaya cabashada sida saxa ah loo soo gudbiyay iyo go'aamin doona haddii dugsiga Degmada uu ku xad gudubay baahida waxbarashada gaarka ah ee la xidhiidha waxbarashada ilmahaaga. Sidoo kale, dhinac saddexaad - oo ah, qof kale oo aan adiga ahayn, ama hay'ad ama urur kale oo aan ahayn dugsiga degmada - ayaa u soo gudbin kara cabasho Waaxda gobolka haddii aay aaminsan yihiin in Degmada ay ku xad gudubtay baahida waxbarashada gaarka ah ee ku lug leh arday.

Cabashadda gobolka waxaa loo soo gudbin karaa Waaxda wakhti kasta ***hal sano*** gudahiis marka xadgudubka waxbarashada gaarka ah uu dhacay. Cabasho kasta oo ku andacoonaysa inuu xadgudubku dhacay in ka badan hal sano ah laga bilaabo taariikhda cabashada la xareeyay lama baadhi/xallin doono.



### Sida Cabashada Gobolka ee Rasmiga ah loo Sameeyo

Haddii aad jeclaan lahayd inaad cabasho ka samayso gobolka rasmi ah oo ku saabsan waxbarashada gaarka ah, waa in aad:

- Soo buuxisaa foomka gobolka ee cabashadda oo u soo dirtaa Waaxda Waxbarashada Ohio Xafiiska Caruurta Gaarka ah, ama
- Soo qortaa warqad cabasho ah; ama
- Ka wac shaqaalaha Waaxda Xafiiska Caruurta Gaarka ah 1-877-644-6338 iyo codsato foomka cabashada, oo aad buuxin doonto iyo ku soo celi Waaxda.

### Xaggee Lagu Dira Cabashadaada

Cabashadaada waa in loo diraa ***Waaxda Waxbarashada Ohio Xafiiska Caruurta Gaarka ah*** iyo kormeeraha dugsiga degmada labadaba waqti isku mid ah.

U soo dir cabashadaada asalka ah:

Waaxda Waxbarashada Ohio Xafiiska Carruurta Gaarka ah Ku aadan:
Kaaliyaha Agaasimaha Xallinta Khilaafaadka Qodobka
25 South Front Street
Mail Stop 409
Columbus, Ohio 43215-4183

### Hakinta

Hakinta macnaheedu waa in hakad la geliyo arrimaha cabashada gobolka wax ka qabadkooda. Haddii adiga iyo dugsiga Degmada aad ku lug leedihiin dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista, oo adiga ama degmada midkiin uu sidoo kale u soo gudbiyo cabasho gobolka ku saabsan arrimo la mid ah dhibaatadii jirtay, Waaxda Waxbarashada ee Ohio cabashada gobolka waxay gelin doontaa hakad. Si kale haddii loo dhigo, Waaxdu waxay sugi doontaa ilaa iyo inta uu nidaamka xuquuq dhowrista ka dhamaanayo hor inta aanay xalin cabashadaada gobolka. Haddii aad ka noqoto codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista, Waaxda cabashada gobolka ayay ka bixin doontaa hakinta iyo sii wadi doonta xallinta cabashadaada.

Haddii dhageysiga nidaamka xuquuq dhowristu dhacay oo uu go'aan soo saaray sarkaalka dhegaysiga aan eexda lahayn (IHO), markaas, Waaxda waxay ka qaadi doontaa cabashada gobolka hakinta si loo xaliyo oo keliya haddii arrimaha cabashadaada uusan weli go'aansan sarkaal dhageysiga.



**Dukumentiyada Qodobada Waa inaad ku soo lifaaqdo Cabashada Gobolka**

- War qoraal ah oo sheegaya in dugsiga Degmada ku xad gudubtay sharuudaha waxbarashada gaarka ah ee federaalka ama gobolka.
- Sharaxaad ku saabsan dhibaatada, oo ay ku jirto xaqiiqooyinka ku saabsan arrinta aad ku salaysay cabashadaada.
- Macluumaadka lagala xidhiidhayo iyo saxiixa asalka ah.
- Haddii aad soo gudbisay xad gudub waxbarashada gaarka ah iyada oo la tixgelinayo arday gaar ah:
  - Magaca iyo cinwaanka deegaanka ee ardayga;
  - Magaca dugsiga ee uu ardayga dhigto;
  - Haddii ay jirto xaalad ilmo ama dhallin bilaa guri ah (sida ku qeexan Xeerka Caawinta Guri La'aanta McKinney-Vento), macluumaadka lagala soo xidhiidhi karo ardayga iyo magaca dugsiga ardaygu dhigto;
  - Tilmaanta nooca dhibaatada, oo ay ku jiraan xaqiiqooyinka la xiriira dhibaatada; iyo
  - Xallinta la soo jeediyey ee dhibaatada illaa inta la garanayo ee ay heli karaan dhinacyada waqtiga cabashada la soo gudbiyay.
- Cabashada*waa inay leedahay saxiixaada asalka ah, si aadan ugu soo dirin fakis ama email cabashada.*
- Cabashooyinka magac la'aanta lama aqbali doono.

## Habka loo maro Cabashada Gobolka

Marka Waaxdu ay hesho cabashada gobolka, hadii si fiican loo soo gudbiyay, waxay bilaabi doonaan dib u eegida iyo, hadba sida loogu baahdo, baadhitaanka ku xadgudbka(yada) la sheeganayo ee shuruudaha waxbarashada gaarka ah. Xafiiska Caruurta Gaarka ah waa in ay xaliyaan cabashada 60 maalmood laga bilaabo taariikhda u helay cabashadaada gudahood.

Iyadoo qayb ka ah geeddi-socodka cabashada, Xafiiska Caruurta Gaarka ah ayaa:

- Dib u eegaya cabashadaada iyo go'aan ka gaaraya haddii uu awood u leeyahay inuu xaliyo eedeymaha ku jira cabashadaada;
- Ugu soo sheegaya adiga iyo dugsiga degmada qoraal ahaan in eedeymaha la xallin doono, iyadoo ay ku jiraan baadhitaano (haddii loo baahdo);
- Idiin siin doona dhexdhexaadin ama fududeyn adiga iyo degmada oo ah si hab kale ah oo loo xaliyo cabashada;
- Weydii wixii macluumaad dheeraad ah ee laga yaabaa inaad u baahan tahay adiga iyo degmada oo ku saabsan eedeymaha ku jira cabashadaada;
- Dib u eegaan dukumentiyada dheeraadka ah iyo macluumaadka adiga iyo Degmada aad soo gudbiseen, qabtaa wareysiyo telefoonka ah iyo soo booqanayaa degmada ilmahaaga, hadba sida u arkaan inay lagama maarmaan u tahay;
- Siinayaa degmadaada fursad ay uga jawaabaan cabashadaada iyo u bixiyaan xal; iyo
- Qorayaan warqad ay idinku wargelinayaan adiga iyo degmada go'aankooda ku saabsan in xadgudub waxbarashada gaarka ah uu ka dhacay ama in kale (ka dib markii ay dib u eegis iyo baadhitaan sameeyaan, haddii loo baahdo, kuna qabanayaan wax aan ka badanayn 60 maalmood laga bilaabo taariikhda ay heleen cabashadaada).

### Sii Kordhinta Waqtiga

Waaxdu waxay ku qaadan karaan in ka badan 60 maalmood si loo xaliyo cabashada iyo loo soo saaro warqada go'aankeeda, haddii uu jirto waqti kordhin ah. Kordhinta xadka waqtiga 60-ka maalmood ee lagu xalinayo cabashada gobolka waxaa la samayn karaa marka:

- Adiga iyo Degmada aad ku heshiisaan wakhti dheeraad ah si aad labadiina iskugu daydaan si loo xaliyo dhibaatada iyada oo loo marayo dhexdhexaadinta, fududeynta ama qaar ka mid ah hababka kale ee khilaaf xalinta ee ku bedelashada ah; ama marka
- Ay jiraan xaalado aan caadi ahayn (oo uu u go'aamiyay Xafiiska Caruurta Gaarka ah iyadoo loo eegayo xaalad ka xaalad).

### Soo Gudbinta Saxda ah

Haddii Xafiiska Caruurta Gaarka ah ay go'aamiso in aadan si fiican u soo gudbin cabashada gobolka, sababtoo ah aadan ku soo wada darin dhammaan macluumaadka loo baahan yahay ee ku saabsan arrinta aad rabto in la xaliyo, ama haddii Xafiiska Caruurta Gaarka ah uusan awood u lahayn inuu soo baadho cabashadaada, Xafiiska Caruurta Gaarka ah ayaa kuu soo diri doona warqad uu kugu sharaxayo: Sababta aanay hore ugu gudbi karin in la xaliyo cabashadaada, sababta go'aanka iyo, haddii ay ku khuseeyso, macluumaadka aad u baahan tahay inaad ku soo darto cabashadaada cusub si loogu tixgeliyo inaad si fiican u soo gudbisay.

### Dib u soo gudbinta Cabashada

Haddii ay tahay inaad dib mar labaad u soo diro cabaso leh macluumaad cusub, hubi in aad cabashadaada u diro Waaxda Waxbarashada Ohio iyo dugsiga degmada hal sano gudaheed marka xadgudubka waxbarashada gaarka ah ee lagu eedeeynayaa uu dhacay. Haddii aad ku soo dartay cabashadaada arrimo aysan Waaxdu awood u lahayn xalintooda, waxay kuu gudbin doonaan illaha ku haboon, sidii wax looga qaban lahaa arrimahaas.

**Habka loo maro Cabashada Gobolka: Waqtiyada iyo Talaabooyinka Muhiimka**

**Buuxinta Cabashada**

- Cabashada la soo gudbiyo hal sano gudaheed marka xadgudbka la sheeganayo uu dhacay.
- Waalidku waxay siinayaan cabashada rasmiga ah Waaxda Waxbarashada Ohio iyo nuqulkana degmada.
- Cabashadu waxay ku andacoonaysa in lagu xad gudubay sharuudaha waxbarashada gaarka ah waxaana la socda xaqiiqooyin taagyeeraya.

**Ohio Waaxda Dib u eegista Cabashada Waxbarshada**

- Waaxdu waxay u soo diraysaa warqad Ogeysiinta helitaanka qofka u soo gudbiyey cabashada iyo dugsiga degmada.
- Waaxda Waxbarashada Ohio waxay soo diraysa warqada ku filnaansho la'aanta haddii cabashada aan si fiican loo soo gudbin, ama haddii Waaxdu aysan lahayn awood ay ku xaliso dhibaatada.

**Xallinta**

- Waaxdu waxay dib u eegta waraaqaha oo dhan iyo codsataa waraaqo/macluumaad dheeraad ah haddii ay baahato.
- Waaxda waxay waraysataa shaqsiyaadka ku haboon, hadba sida loogu baahdo.

**Waaxdu waxay diraysaa Waraaqda Cadeynta**

- Waaxda ayaa soo saareysa go'aan ku saabsan eedeyn walba iyo haddii ay jirto xad gudub lagu sameeyay waxbarashada gaarka ah.
- Waaxda ayaa soo saaraysa talaabooyinka sixidda halkii lagu helo inay degmada ku xad gudubtay.



## Soo Gudbinta Cabashada Nidaamka Xuquuq Dhowrista

Hal hab oo ay waalidiintu kula xalin karaan walaac gaar ah ee ku saabsan waxbarashada gaarka ah ee ilmahooda dugsiga degmada waa inay si toos ah ugu gudbiyaan codsiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista degmada, isla markaasna u gudbiyaan hal nuqul Waaxda Waxbarashada Ohio. Marka aad saas samayso, waxaad soo gudbisay dhagaysiga nidaamka xaquuq dhowrista (oo sidoo kale loo yaqaan codsiga nidaamka xuquuq dhowrista). Waxaa jira dad kale oo soo gudbin kara cabashashada nidaamka xuquuq dhowrista.



- Ardayga, haddii uu ugu yaraan 18 sano jir yahay;
- Dugsiga degmada; ama
- Hay'adaha kale ee waxbarashada dadweynaha.

### Sababaha loo Soo Gudbiyo

Cabashada nidaamka xuquuq dhowrista waxaa loo soo gudbin kartaa walaac ku lugta leh waxyaabahaan soo socda ee waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga:

- Aqoonsiga ilmaha naafada ah;
- Qiimeynta ilmaha naafada ah;
- Kumeelaynta waxbarasho ee ilmaha naafada ah; ama
- Siinta waxbarashada ku habboon dadweynaha oo lacag la'aana (FAPE) ilmahaaga.

Cabashada nidaamka xuquuq dhowrista waa inay sheegayso in shuruudaha waxbarashada gaarka ah ee federaalka ama gobolka lagu xad gudbay oo waa in lagu soo xereeyaa ***labo sano*** gudahood laga bilaabo taariikhda waalidka (ama hay'adda waxbarashada dadweynaha ee cabanaysaa) ogaatay ama ay ahayd inay ogaadaan arrinta ku saabsan eedeeymaha xadgudub waxbarashada gaarka ah. Mar kasta oo Waaxda Waxbarashada ee Ohio ay hesho cabasho dhagaysiga nidaamka, waalidiinta iyo dugsiga degmada ee ku lugta leh waa in ay heystaan fursad ay uga soo qayb qaataan dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista. Dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista waa dacwad rasmi ah, taas oo sarkaal dhexdhexaad ka ah dacwada u qaybisaa Waaxda si ay u qabtaan dhagaysi si loo xaliyo cabashada nidaamka xuquuq dhowrista.

### Macluumaadka lagu daraayo

Waaxda waxay bixisaa foomka loo isticmaali karo in lagu codsato nidaamka dhagaysiga. Qofka ama Hay'adda waxbarashada dadweynaha ee soo gudbinaya codsiga qasab kuma aha inay isticmaalaan **foomka Waaxda**, laakiin qofka ama ururku waa inay ku soo qoraan macluumaadkan loo baahan yahay marka ay soo gudbinayaan cabashada nidaamka dhagaysiga:

1. Magaca ardayga;
2. Cinwaanka ardayga ama macluumaadka la xiriirka;
3. Magaca dugsiga degmada:
4. Haddii ilmahaagu uu yahay guri la'aan, macluumaadka xiriirka loo heli karo ilmahaaga iyo magaca dugsiga ilmahaagu dhigto;
5. Sharaxaad ku saabsan dhibaatada gaar ah ee ku saabsan ilmahaaga, iyo sidoo kale xaqiiqooyinka ku saabsan dhibaatada; iyo
6. Fikradaha ama talooyinka si ay u xalliyaan dhibaatada.

Cabashada nidaamka xuquuq dhowrista waa inay ku jiraan macluumaadka isku mid ah, uu u faahfaahsan sida lagu sheegay cabashadda gobolka (eeg bogga 18), si kastaba ha ahaatee saxiix asalka ah looma baahna. Waxaa loogu soo dhiibi karaa dugsiga degmada iyo Waaxda qof ahaan, boostada, fakis ama email. Arrimaha aan ka midka ahayn cabashadaada nidaamka xuquuq dhowrista ee asalka ah dib uma uu eegi doono sarkaalka dhagaysiga inta lagu jiro dhagaysiga nidaamka xuquuq dhowrista.

### Wax Ka beddelidda Cabashada Nidaamka Xuquuq Dhowrista

Wax ka beddelidda cabashada nidaamka xuquuq dhowrista waa dib hagaajinta cabashada ka dib markii aad horay ugu soo gudbisay Waaxda Waxbarashada Ohio. Waxaad wax ka beddeli kartaa cabashadaada nidaamka xuquuq dhowrista oo kaliya haddii:

- Dhinaca kale u ogolaaday in cabashada nidaamka xuquuq dhowrista wax laga bedelo, iyadoo qoraal ah, oo la siiyo fursad ah si loo xaliyo cabashada iyadoo loo marayo kulanka xallinta (kulanka xalinta khilaafka waxaa lagu tilmaamay bogga 23); ama
- Sarkaal dhexdhexaad ka ah dhageysiga uu bixiyo fasax. Sarkaalka dhageysiga ayaa ku siin kara ogolaanshahaas oo ah ilaa shan maalmood ka hor inta geedi socodka dhagaysiga uusan bilaabin, laakiin ma aha wixii markaa ka dambeeya.

## Waqtiga iyo Habraaca Nidaamka Xuquuq Dhowrista

Haddii aad aad gudbiso cabasho nidaamka xaquuq dhowrista oo ka dhanka ah dugsiga degmada ilmahaaga, waa inaad 10 maalmood gudaheed ku hesho cabashadaada nidaamka xuquuq dhowrista, Degmada waa in ay ku siin ogeysiis hore oo qoran ama jawaab ku saabsan xadgudub waxbarashada gaarka ah ee lagu eedeeyay, haddii aysan Degmada hore ku siinin ogeysiiska noocaasa (eeg bogga 9). Ogeysiiska hore ee qoraalka ah ee ay degmada ku siinaysaa waa inay ku jiraan:

- Sharaxaad ku saabsan tallaabada aad codsatay ama cabashadaadu ku saabsan tahay. Tani waxay noqon kartaa ficil ay Degmada doonayso in ay qaado ama ficil ay diidey inay qaado. Degmada waa inay sidoo kale sharaxaad ku bixisaa jawaabta sababta dugsigu u doonayo inuu u qaado talaabada ama u diiday in ay u qaado talaabadaas;
- Sharaxaada dhammaan hababka loo isticmaalay in lagu qiimeeyo ilmahaaga, diiwaanada ku saabsan ilmahaaga iyo warbixinta Degmada isticmaalshay si ay u sameeyaan go'aanka ah in la qaado talaabo ama aan talaabo la qaadin;
- Sharaxaad ku saabsan fursadaha kale ee kooxda IEP u tixgeliyeen ilmahaaga iyo sababta ay u diiday fursadahaas; iyo
- Sharaxaada qodobbada kale ee la xiriira go'aanka degmada ee ah in la qaado ama aan la qaadin talaabo.

Dugsiga degmada sidoo kale waa inuu ku siiyaa macluumaad bilaash ah ama qiimo-yar oo ku saabsan caawinaada sharci iyo adeegyada kale ee la xiriira ee aad ka heli karto.

Haddii dacwada nidaamka xuquuq dhowrista oo adiga waalid ahaan ka soo horjeeda la soo gudbiyo, waa in aad cabashadaas uga soo jawaabtaa 10 maalmood gudahood. Jawaabtaada waa in si gaar ah looga hadlo arrimaha lagu soo qaaday cabashada nidaamka xuquuq dhowrista.

### Kufilnaanshaha

Cabashada nidaamka xuquuq dhowrista waxaa loo tixgelin doonaa mid ku filan (taasoo la micno ah in si sax ah loo soo gudbiyay) ***haddii aysan***dhinaca kale la soo socodsiin sarkaalka dhageysiga eex la'aanta iyo dhinaca soo gudbiyey cabashada in soo gudbintoodu aysan ahayn mid soo buuxisay shuruudaha xereynta (tusaale ahaan., ay tahay mid aan ku filnayn). Dhinaca kale waa inay uga doodaan kufilnaan la'aantaas dacwada nidaamka xuquuq dhowrista, qoraal ahaan, 15 maalmood gudahood marka cabashada nidaamka xuquuq dhowrista la helay.

Tusaale ahaan, haddii aad soo gudbiso cabashada nidaamka xaquuq dhowrista degmadaada (oo aad nuqul u soo gudbisay Waaxda Waxbarashada Ohio), waxa loo qaadan doonaa mid kufilan haddii aysan Degmada ku soo wargelin sarkaalka dhagaysiga, 15 maalmood gudahood qoraal ahaan, inaysan u malaynayn in aad codsiga si fiican u soo gudbisay. Markaas, sarkaalka dhageysiga wuxuu haysta shan maalmood oo taariikheed laga bilaabo marka uu helo ama ay hesho ogeysiiska degmadaada ee qoraalka si ay u go'aamiyaan haddii cabashadaada nidaamka xuquuq dhowrista ay tahay mid ku filan (oo soo buuxisay shuruudaha dacwada nidaamka xuquuq dhowrista ee lagu so sheegaybogga 21). Sarkaalka dhageysiga waa inuu sidoo kale isaga ama iyada u soo diraa go'aankiisa adiga iyo degmada, isagoo qoraal ahaana, 15 maalmood gudahood.

Haddii sarkaalka dhegeysiga uu go'aansado in cabashadaada nidaamka xuquuq dhowrista ay tahay mid aan ku filnayn, waxaad fursad u haysataa in aad
dib u soo gudbiso cabashada nidaamka xaquuq dhowrista oo cusub ama wax ka beddesho cabashada asalka ee nidaamka xuquuq dhowrista, hadiiba aay oggoshahay Degmada oo ay helayso fursad ay ku xaliso xaaladda iyada oo loo marayo kulanka xalinta ama fasaxa sarkaalka dhagaysiga waxaan ka dambayn shan maalmood ka hor bilowga dhageysiga.

Haddii aad si habboon wax uga beddesho cabashadaada nidaamka xuquuq dhowrista, markaa waxaa bilaabanaya xalinta khilaafka muddo 30 maalmood ah (eeg bogga 23) markii aad soo gudbisay wax ka beddelida cabashadda.

## Xallinta Nidaamka Xuquuq Dhowrista

### Muddada Xallinta

Xiliga xalinta khilaafka waa waqtiga u dhexeeya soo gudbinta cabashashada nidaamka xuquuq dhowrista iyo waqtiga dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista uu dhaco. Xiliga xalinta khilaafka wuxuu quseeya kulanka xalinta kaas oo bixiya fursad, mar labaad, lagu xaliyo khilaafka waxbarashada gaarka ah ka hor inta xiliga dhagaysiga dacwada uusan si rasmi ah u bilaamin. Haddii aad soo gudbiso cabasho nidaamka xuquuq dhowrista, laakiin aad ku guuldareysato inaad ka soo qayb qaadato geedi socodka xalinta khilaafka, taas waxay dib u dhigi doontaa bilowga iyo waqtiyada nidaamka xuquuq dhowrista (macluumaad dheeraada oo waqtiyada ayaa hoos ku qoran).

Xiliga xalinta khilaafka waa 30 maalmood laga bilaabo taariikhda cabashada nidaamka xuquuq dhowrista la soo xareeyay (ama laga bilaabo taariikhda cabashada sida habboon wax looga beddelay). Haddii dugsiga Degmada aanu u xalin cabashada nidaamka xuquuq dhowrista si aad ku qanacsan tahay markii 30 maalmood la dhaafto, dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista ayaa laga yaaba inuu sii socdo. Marka 30-ka maalmood ee xiliga xalinta khilaafka dhamaato, waxaa jira waqti ah 45-maalmood oo dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista iyo sarkaalka dhagaysiga cadaalada ay ku gaaraan go'aan (eeg bogga 24), haddii aadan adiga iyo Degmada ku heshiin dhexdhexaadin midaasoo u gudbi doonta 30 maalmood. Sidoo kale ogsoonow in mudada 30ka maalmood ee xallintu ay dhammaan karto goor hore haddii, inta lagu guda jiro mudadaas 30 maalmood, adiga iyo Degmada aad ugu heshiisaan si qoraal ah in uusan heshiis macquul ahayn.

Inta lagu jiro muddada 30 maalmood ee xalinta, iyo 15 maalmood ee ugu horeeya marka la helo cabashada nidaamka xuquuq dhowrista, dugsiga Degmada waa inuu qabta ballanta kulanka xallinta. Haddii aysan Degmada qaban kulanka xalinta khilaafka 15 maalmood gudahood ama aanay ka soo qayb gelin kulanka xalinta khilaafka, waxaad codsan kartaa in sarkaalka dhagaysiga uu bilaabo waqtiga dhegaysiga nidaamka xuquuq dhowrista ee ah 45 maalmood. Degmada loogama baahna inay ballanta kulanka xallinta qabato haddii ay soo gudbisay dacwada nidaamka xuquuq dhowrista.

### Shirka Xallinta

Ujeedada kulanka xalinta khilaafka waa in aad hesho fursad aad uga hadasho dhibaatooyinka ka jira cabashada iyo dugsiga degmada ku helo fursad ay kala shaqeeyaan xalka. Mas'uuliyadda la isku yeedhayo kulanka xalinta khilaafka waxaa iska leh degmada, iyo waxaa laga doonayaa inaad ka soo qayb gasho. Haddii aadan ka qayb galin kulanka xalinta khilaafka iyo degmada qoraal ka sameyso ka soo qaybgalid la'aantaada, degmada waxay weydiisan kartaa sarkaalka dhegeysiga inuu joojiyo cabashadaada nidaamka xuquuq dhowrista dhamaadka mudada 30-ka maalmood ah.

Adiga iyo dugsiga degmada ayaa go'aaminaya xubnaha kooxda IEP ee ka soo qayb galaya kulanka xalinta khilaafka. Kulankaas waxaa qasab ah inuu ku jiro wakiilka dugsiga degmada kaasoo awood u leh inuu go'aan u sameeyo degmada.

Qareenka degmada kama soo qeyb gali doono shirka haddii aadan adigu dooran in aad halkaas keensato qareenkaada. Kulankan waa tallaabo looga baahan yahay nidaamka xallinta, haddii aadan adiga iyo Degmada ugu wada heshiin si qoraal ahaan inaad ka tanaasultaan kulanka xalinta khilaafka ama adiga iyo Degmada aad ku heshiisaan isticmaalka dhexdhexaadinta halkii aad ka isticmaali lahaydeen kulanka xalinta khilaafka. Adiga iyo degmada waa la idiin ogol yahay inaad sii wadataan dhexdhexaadinta marka la dhaafo mudada 30 maalmood ee xalinta haddii aad labadiina ku heshiisaan inaad sidaa sameeysaan. Tani waxay ka hortagi doona in mudada dhegeysiga ee 45-maalmood ee nidaamka xuquuq dhowrista iyo waqtiga go'aanku bilaabaan.

Haddii adiga iyo Degmada aad ku xalisaan khilaafkiina kulanka xalinta khilaafka, waa inaad wada saxiixdaan heshiis sharci ah:

- Xerarka sida ay waxa u dhici doonaan oo qoraal ah;
- Waxaa saxiixaya adiga iyo wakiilka degmada; iyo
- Maxkamadu dhaqangelin karto.

Sharci ahaan ku qabanaya macnaheedu waxa weeye in haddii adiga ama dugsiga degmada sameyn weydo heshiiska, maxkamadda waxay ku qasbi kartaa adiga ama Degmada inay sidaa sameeyaan.

Haddii adiga ama dugsiga degmada go'aansato in uusan raali ku ahayn heshiin, ka dib markii u saxiixay heshiiska, midkiinba waa joojin kara heshiiska saddex maalmood oo shaqo gudahood markii la saxiixay.

Haddii adiga iyo dugsiga degmada aad heshiis ka gaartaan cabashada nidaamka xaquuq dhowrista muddada 30-maalmood ka hora, cabashada waa la xiri doonaa, oo lama qaban doono dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista.

## Geedi socodka Dhageysiga

Dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista waa in la qorsheeyaa oo lagu qabtaa goob iyo waqti macquul ah oo ku habboon adiga iyo dugsiga degmada. Sarkaal dhexdhexaadiye ah ayaa idinla soo xariiri doona adiga iyo degmada waqti isku mid ah mar kasta oo loo baahan yahay xidhiidhka inta lagu guda jiro hawsha dhagaysiga. Haddii si kale loo dhigo, dhamaanba xiriirka u dhaxeeya sarkaalka dhexdhexaadka ka ah dhagaysiga, adiga iyo degmada waxay wada dhici doonaan mar isku mid ah oo aan ahayn si gooni gooni ah.

Mudada waqtiga dhagaysiga nidaamka xuquuq dhowrista ee ah 45 maalmood (waxay si sargaalka dhexdhexaadiyaha dhagaysiga u gaaro go'aan) bilaabmaysa ka dib markii mudada xallinta 30ka maalmood ah ay dhamaato ama ka dib markii mid ka mid ah waxyaabahaani dhaco:

- Adiga iyo Degmada aad ugu heshiisaan si qoraal ahaana in aad ka tanaasushaan (aan la qaban) kulanka xalinta khilaafka; ama
- Marka aad biloowdaan ka xaajoodka arrimaha shirka xallinta ama shirka dhexdhexaadinta, oo aad adiga iyo Degmada ugu wada heshiisaan si qoraal ah in uusan heshiis macquul ahayn; ama
- Adiga iyo Degmada ugu heshiisaan si qoraal ah in laga gudbo xilliga maalmood ee xalinta si aad u sii wadaan dhexdhexaadinta, ka dibna midkiin adiga ama Degmada uu ka baxo geedi socodka dhex dhexaadinta.

Haddii sarkaalka dhagaysiga dhexdhexaad ka ah u ogolaaday in uu siiyo waqti dheeraad ah (ama si kale haddii loo dhigo, ku deeqo waqti dheeraad ah), oo uu codsi ka yimaado mid ka mid ah dhinacyada 45-maalmood gudahood dhagaysiga, sida soo socota ayaa dhici doonta:

- Dhagaysi waa in la qabtaa;
- Go'aanka dhegaysiga waa in la gaaray; iyo
- Nuqul ka mid ah go'aanka waa in loogu soo diraa warqad la ansixiyay adiga iyo dugsiga degmada labadaba, iyo sidoo kale in Waaxda Waxbarashada Ohio

Ugu yaraan shan maalmood ka hor dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista, adiga iyo dugsiga Degmada waa inaad ka soo qayb gashaan shirka shaac ka qaadida. Kani waa wada hadal lagu hubsanayo in adiga iyo Degmada labadiinaba aad haysataan macluumaadka loo soo bandhigi doono dhegeysiga.



**Dhageysiyada nidaamka xuquuq dhowrista waxa qaban doona Sargaalka Dhagaysiga Ka madaxbanaan**

**Marka cabashada nidaamka xuquuq dhowrista aan la xallin karin, waxa ay horseedi doonta in dhageysi rasmi uu qabto sarkaal dhexdhexaad ka ah dacwada. Sarkaalka dhegaysiga waa in uu ahaada qareen ay u tababbaray Waaxda Waxbarashada Ohio inuu fuliyo dacwada nidaamka xuquuq dhowrista.**

**Dugsiga degmada ayaa bixiya kharashka sarkaalka dacwada qaadaya, hase ahaatee shaqsigaani waa mid dhexdhexaada, oo dhinac saddexaada. Isaga ama iyada kama shaqeeyo dugsiga degmada ama hay'adaha kale ee dadweynaha ee ku lugta leh waxbarashada iyo waxaa laga yaabaa in aanay ku lahayn dan shakhsiyadeed ama mid xirfadeed taasoo u dadbanaan lahayd dhinac gooni ah.**

**Intaa waxaa dheer, sarkaalka dhegeysiga wuxuu si fiican u yaqaanaa shuruudaha waxbarashada gaarka ah, oo ay ku jirto IDEA, sharciyada gobolka iyo federaalka iyo xeerarka iyo sida maxkamadaha u fasiraan xaaladaha waxbarashada gaarka ah.**

**Dhageysiga ka dib, sarkaalka dhageysiga wuxuu soo qori doona go'aan waafaqsan heer ku dhaqanka sharciga. Degmadaada ama Waaxda Waxbarashada Ohio ayaa ku siin kara liiska saraakiisha dhagaysiga iyo aqoontooda, ama waxaad ka heli kartaa liiska adigoo booqanaya education.ohio.gov, iyo ka raadinaya xarfaha (keywords),saraakiisha dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista.**

## Xuquuqda Dhageysiga

Dhagaysi nidaamka xuquuq dhowrista, waxaad xaq u leedahay inaad:

- In ilmahaada ah mawduuca laga hadlayaa uu kula joogo dhegeysiga;
- Codsto in dhagaysigu uu u furnaado dadweynaha;
- Qareen ama dad u leh aqoon gaar ah carruurta naafada ah ay ku soo raacaan iyo kula taliyaan;
- Soo bandhigtaa cadaymo (cadeyn), ka hortagto iyo su'aalo weydiinta markhaatiyada (su'aasho) iyo weydiisato inay yimaadaan markhaatiyaal (mar kale, dhageysiga waxaa looga hadli doono oo kaliya arrimaha aad ku soo sheegtay cabashadaada nidaamka xaquuq dhowrista, haddii aysan Degmada ku ogolaan inaad ka ku soo darto arrimo cusub);
- Mumnuucida ah in la soo bandhigo caddayn kasta oo aan horay lagu tusin ugu yaraan shan maalmood oo shaqo ka hor dhageysiga; iyo
- Iyadoo lacag la'aan ah, inaad hesho qoraal erey ilaa eray ah, ama haddii aad doorbidayso elektaroonik ah, diiwaanka dhegeysiga, iyo diiwaanada mid ka mid ah natiijooyinka iyo go'aamada.

### Haddii uu Kula Socdo Qof u Doode ah oo Aan Qareen Ahayn

Haddii aad ku weheliyay qof u doode ah kuwaas oo aan ahayn qareen, dadkaas xaq uma laha inay ka helaan kharashka qareenka (qareenka) (ama wixii kharash ah ee adeegyadooda) dhinaca kale. U dooduhu kuma shaqeysan karaan sharciga dhegeysiga iyo ka qaybgalka doodaha waa la xaddidi karaa inta lagu guda jiro dacwada.

## Dedejinta Dacwada Nidaamka Xaquuq Dhowrista iyo Waqtiga

Dhagaysiga dacwadeed ee degdegta ah waa dhageysi leh waqti dhakhso ah oo u fududaynaya xallinta khilaafaadka waxbarashada gaarka ah qaarkeed si dhaqso ah. Adiga ama degmada ayaa soo gudbin kara codsi ah dacwad dhagaysi oo degdega sabab ka mid ah xaaladahaan oo kaliya haddii:

1. Waad diidan tahay go'aanka dugsiga degmada ee kumeeleynta waxbarasho ee ilmahaaga (barnaamijka ama adeegyada), oo taasuna ay ahayd natiijo ka timid dugsiga oo edbinayay ilmahaaga; ama
2. Aad diidan tahay natiijooyinka go'aanka muuqda; ama
3. Dugsiga degmada aaminsan yahay in ku meeleynta waxbarasho ee hadda ee ilmahaaga (barnaamijka ama adeegyada) ay tahay qatar u badan tahay inay ku keento dhaawac ilmahaaga ama dadka kale.

Waqtiga cabashada nidaamka xuquuq dhowrista degdegta ah waxaa ku jira xiliga xalinta khilaafka oo ah 15 maalmood gudahood iyo waqtiga dhagaysiga oo ah 20 maalmood oo maalmaha dugsiga ah. Dugsiga Degmada waa inuu ku qabtaa kulanka xallinta toddobo maalmood oo taariikheed markay helaan cabashada  nidaamka xaquuq dhowrista gudahood. Ka dib markii dhagaysiga cabashada nidaamka xaquuq dhowrista degdegta ah dhamaado, sarkaalka dhageysiga ayaa 10 maalmood oo maalmaha dugsiga ah ku soo saaraya go'aan qoraal ah iyo siin doona adiga iyo degmada. Waqti dheeriya laguma dari doono inta lagu guda jiro cabashada nidaamka xaquuq dhowrista degdegta ah.



## Qaadashada racfaanka Go'aanka

Go'aanka uu sameeyey sarkaalka dhexdhexaadka ka ah dacwada gabogabada dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista waa kamadambays haddii uusan dhinac si toos ah racfaan ugu soo gudbin Waaxda Waxbarashada Ohio muddo 45 maalmood ah markii ay heleen go'aanka. Dhinaca laga guulysta waa waalidka ama degmada marba kuu go'aanka sarkaalka dhagaysigu u roonayn (taas oo macnaheedu yahay in dhinacaasi uusan adkaan).

### Sida Racfaan Looga Qaato Go'aanka Sarkaalka Dhageysiga

Si aad racfaan uga qaadatid go'aanka sarkaalka dhagaysiga, waa in aad u soo diri nuqul ka mid ah racfaankaada oo qoraal ah Waaxda iyo nuqul kale oo rafcaanka kormeeraha dugsiga degmada. Waaxda ayaa u magacaabi doonta sarkaalka dib u eegista heerka gobolka (sarkaalka dib u eegista) si uu u qabto dib u eegis dhexdhexaad ah go'aanka nidaamka xaquuq dhowrista. Waaxda Waxbarashada Ohio ayaa bixin doonta kharashka sarkaalka dib u eegista. Sarkaalka dib u eegista ayaa baari doona dhamaanba diiwaanka dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista. Intaa waxaa dheer, in sarkaalka u eegista wuxuu hubsan doona inuu dhageysigu raacayo shuruudaha nidaamka xuquuq dhowrista iyo u raadiya caddaymo dheeraad haddii ay lagama maarmaan yihiin. Sarkaalka dib u eegista wuxuu ka codsan karaa dood hadal ah ama qoraal ah adiga iyo dugsiga degmada. Haddii sarkaalka dib u eegista u qabto dhagaysi si ay u eegaan dooda hadalka, xuquuqda dhegaysiga oo dhan (eeg bogga 25) ee lagugu siiyay dhageysiga nidaamka xaquuq dhowrista oo kale ayaad awoodi kartaa inta lagu jiro dhagaysiga.

### Si aad u Codsato Rafcaanka Go'aanka Sarkaalka Dhageysiga Dhexdhexaadka ka ah

Waxa laga yaabaa inaad u diidid karto go'aanka sarkaalka dhageysiga dhexdhexaadka ah (racfaanka) si qoraal ah 45 maalmood oo taariikheed marka aad hesho go'aanka gudahood. U soo dir rafcaankaaga:

Waaxda Waxbarashada Ohio<br>
Xafiiska Caruurta Gaarka ah<br>
Qaybta Khilaaf Xallinta<br>
25 South Front Street<br>
Mail Stop 409<br>
Columbus, Ohio 43215

Waxii kaalmo dheeraad ah, fadlan ka soo wac Waaxda Waxbarashada Ohio Xafiiska Caruurta Gaarka ah (614) 466-2650, ama qadka bilaasha ah (877) 644-6338.

### Waqtiga / Sii dheeraynta

Muddo 30 maalmood ka dib markii Waaxda hesho codsigaaga dib u eegista heerka gobolka ah, sarkaalka dib u eegista ayaa soo saari doona go'aan, haddii isagu ama iyadu ay ku deeqdo sii dheerayn, taas oo ay weydiisan karaan waalidka ama degmada (si kastaba ha ahaatee, la soco inaan mar kale la bixin karin sii dheereyn inta lagu guda jiro racfaanka dhagaysi nidaamka xaquuq dhowrista degdegta). Waxa kale oo aad codsan kartaa nuqul elektaroonik ama qoraal ah ama diiwaanka eray ilaa erayga oo elektronika inaad inaad ka hesho sarkaalka dib u eegista iyo go'aan.

### Racfaanka Maxkamadda Federaalka ama Gobolka

Go'aanka heerka gobolka ee dib u eegista waa kama dambays haddii aan racfaan loo qaadan maxkamadda federaalka ama gobolka. Dhinaca cabanaya (oo aan ku adkaan) go'aanka sarkaalka dib u eegista wuxuu xaq u leeyahay inay u soo gudbiyaan dacwad maxkamadda federaalka 90 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda go'aanka sarkaalka dib u eegista ama soo bixitaanka ka yimaada qirashada caadiga ah ee gobolka, taas oo dugsiga degmada ilmahaaga ee deegaanka uu ku yaalaa 45 maalmood maalinta la helo ogeysiiska go'aanka sarkaalka dib u eegista gudahood. Maxkamadda ayaa dib u eegi doonta diiwaanada, dhagaysan doonta caddayno dheeraada oo ah codsi ka yimid dhinacyada ka dibna soo saaraya go'aan kama dambays ah oo ku salaysan xogta iyo caddaymaha la soo hordhigay. Waa in aad bixisid kharashka maxkamadda rafcaanka aad u gudbiso maxkamadda laakiin, haddii aad ku guulaysato, waxaa laga yaabaa in xaq u leedahay in laga bixiyo maxkamadda kharashkeed iyo waxii kharashka qareenka (ka eeg bogga 28) ikhtiyaaradda ay maxkamadda leedahay.

## Xaaladda Carruurta inta lagu guda jiro Nidaamka Xuquuqda Dhawrista

- Ilmahaagu waa inuu sii joogaya ama sii dhiganayaa meelaynta waxbarasho ee hadda inta dhagaysiga nidaamka xaquuq dhowristu socdo, haddii adiga iyo Degmada aadan ku heshiin in meelaynta waxbarasho ee ilmahaaga wax laga beddelo.
- Meelaynta waxbarasho ee ilmahaaga hadda waa mida ku tilmaaman IEP isaga ama iyada ay dhawaantaan haysteen.
- Haddii ilmahaaga lagu meeleeyo goob waxbarasho kale oo ku meel gaarka ah (IAES - waxbarashada ku meel gaadh ah oo ah  goob ka baxsan dugsiga) sababta oo ah edbinta dugsiga degmada, ilmahaagu wuxuu sii joogi doona goobtaas waxbarashada ilaa sarkaalka dhagaysigu uu go'aan ka gaarayo ama ilaa anshinta degmada ee ilmahaaga ka dhamaado, hadba kii soo horeeya;
- Haddii cabashada nidaamka xuquuq dhowrista ay ku lug leedahay ku qoritaanka degmada, ilmahaaga, adiga oo fasax laga heysto, waa in lagu  meeleeyaa degmada ilaa nidaamka xuquuq dhowrista uu ka dhamaanayo.
- Haddii cabashada nidaamka xuquuq dhowrista ku lug leedahay codsiga in ay bilaabaan adeega hoos yimaada qayb da'da dugsiga ee sharciga, maxaa yeelay ilmahaagu uu gaaray 3 sano oo mar dembena xaq uma laha adeegyada hoos taga faragelinta hore ee
- Sharciga, dugsiga Degmada loogama baahna inay siiyaan adeegyada faragelinta hore ilmahaagu haddii uusan horay u helin.
- Haddii ilmahaagu la ogaaday inuu xaq u leeyahay adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo waalidku uu oggolaado helitaanka hore ee adeegyada, ka dibna dugsiga Degmada waa in ay bixiyaan adeegyada aan muranka ka dhexeeyn ee waalidka
iyo degmada.
- Haddii sarkaalka dib u eegista uu u ogolaado waalidiinta ilmahaaga beddelida meeleynta inay habboon tahay,  meelaynta waa in loola dhaqmo sida heshiis dhexmaray gobolka iyo waalidka oo ah ka dhigaya ujeedooyin ka joogitaana.

## Kharashka Qareenka

Waxaad dooran kartaa in aad shaqaleysid qareen (qareen) waqti kasta si uu kaga matalo nidaamka xuquuq dhowrista (ama dacwadaha rafcaanka go'aanka nidaamka xuquuq dhowrista), laakiin waa in aad bixiso kharashkaaga kuu gaarka ah ee sharciga. Haddii aad doorato inaad qabsato qareen oo aad ku guulaysato (hesho go'aan wanaagsan) oo ficil la'aana ama dacwada la xiriirta dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista (taasoo ka dhigaysa dhinaca guuleystay), maxkamadda waxay ku amri kartaa inay degmada bixiso kharashka qareenka oo macquulka ah.

### Haddii Degmada guuleysato

Haddii degmada ay guulaysato, maxkamadda waxay ka dalban kartaa inaad siiso kharashka qareenka oo macquulka ah degmada. Waxaa laga yaabaa in maxkamadda ay adiga ama qareenka farto inay bixiyaan kharashka qareenka ee Waaxda Waxbarashada Ohio, ama dugsiga degmada haddii ay ku guuleystaan iyo maxkamaddu go'aamiso mid ka mid ah waxyaabahaan soo socda:

- Haddii fililadaasi ay ahaayeen kuwo qaldan, oo aan macquul ahayn ama bilaa aasaasiya;
- Aad sii wado inaad keento talaabooyin sharci ah ka dib markii ay tallaabaasi si cad u noqotay mid qaldan, oo aan macquul ahayn ama bilaa aasaasiya; ama
- Talaabadaasi loo keenay ujeedo aan munaasib ahayn, sida in wax lagu kadeedo, geysto dib u dhac aan loo baahnayn, ama loogu kordhiyo qiimaha kharashka sharciga iyadoon loo baahnayn.

### Haddii Maxkamaddu Amarto in Kharashka Sharciga Dib Loogu Celiyo Adiga ama Degmada

Haddii ay maxkamaddu amartay in kharashka sharciga in dib loogu celiyo adiga ama degmada, maxkamada ayaa go'aamin doonta qiimaha lacagta macquulka ah. Kharashka qareenka waa in lagu saleeyaa qiimaha caadiga ah ee bulshada goobta ficilka ama dacwada laga xareeyay iyo
nooca iyo tayada adeegyada la bixiyey. Waxaa jira xadka u go'an awoodda maxkamadda ee kharashka qareenka ay amri karto in la bixiyo.
Maxkamaddu ma amri karto in la bixiyo kharashka qareenka xaaladahan soo socda:

- Halka ay Degmada soo bandhigto dalab qoraal ah oo lagu xallinayo khilaafka 10 maalmood gudahood dhagaysiga dacwada, oo aadan ku aqbalin dalabkaas 10 maalmood gudahood, iyo xukunka kiiska uusan ka fiicnayn dalabka xallinta la soo jeediyay inay Degmada bixinayaan,
    - Si kastaba ha ahaatee, maxkamadda waxaa laga yaabaa inay farto in kharashka adiga lagu siiyey haddii aad ku guulaysato ficilka iyo maxkamaddu go'aansato inay ahayd cudur daar fiican sababtii aad u diiday (ahaa sabab fiican) dalabkii xalinta ee Degmada soo jeedisay;
- Ka qaybgalka qareenkaada ee shirka IEP haddii uusan ahayn shir loo qabtay sababo la xariira dhagaysiga maamulka ama talaabo maxkamadeed, iyo
- Ka qaybgalka qareenkaada ee kulanka xalinta khilaafka

### Yaraynta Kharashka Qareenka

Maxkamadda ayaa sidoo kale yareyn kara abaal marinta kharashka qareenka haddii:

- Inta lagu guda jiray dacwada, haddii adiga ama qareenkaadu aad si aan macquul ahayn u daahisaan xalka kama dambaysta ah ee khilaafka;
- Cadada qarashka qareenkaaga uu yahay mid aan macquul ahayn oo ka badan heerka saacadii ay ka tahay bulshada la midka ah mida adeegyada lagu qabtay oo ay qaataan qareenada leh xirfad u dhigma oo macquul ah, sumcad iyo waayo-aragnimo,
- Waqtiga lagu siiyay iyo adeegyada sharciga ee aad heshay ahaayeen kuwo xad-dhaaf ah (oo ka badan) marka loo eego nooca talaabada ama dacwada,
- Qareenkaaga kuma siin macluumaadka ku haboon dugsiga degmada ogeysiiskaadii cabashada.

Kuwan kor ku xusan oo dhan ma quseeyn doonaan haddii maxkamadu ay hesho in gobolka ama dugsiga Degmada ay si aan macquul ahayn u daahiyeen xalka kama dambaysta ee ficilka ama dacwada ama haddii kale ku xadgudbeen dhowritaanka nidaamka IDEA.

# Anshaxa

## Nidaamka Anshax Caruurta Naafada ah

Mararka qaarkood, dugsiga degmada ayaa laga yaabaa inay sii wadaan bixinta adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga naafada ah, xataa ka dib markii Degmada ayaa ku ganaaxeen inuu maqanaado, laga eryo ama haddii kale ilmahaaga laga saaray meeshiisa ama meesheeda waxbarasho ee hadda (ka fiiri IEP ilmahaaga macluumaad dheeraada oo ku saabsan kumeelaynta waxbarasho ee hadda).

### Meelaynta Waxbarashada iyo Beddelkeeda

Haddii ilmahaaga looga saaray goobtiisa ama goobteeda waxbarasho ee hadda ku xadgudubka sharciyada dugsiga degmada in ka yar 10 maalmood oo dugsi oo isku xiga, Degmada ma aha inay bixiyaan adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga inta lagu guda jiro waqtigaas. Haddii ilmahaaga laga saaro dugsiga *in ka badan 10 maalmood oo dugsi oo isku xiga*, dugsiga waa inay sii wadaan inay siiyaano adeegyada waxbarashada gaarka ah ilmahaaga, xitaa haddii ay tahay goob waxbarasho oo kale (tusaale ahaan, fasalka kale, dhismo kale, ama guriga ardayga).

Haddii dugsiga Degmada uu ka saaro ilmahaada meelayntiis/teeda hadda in ka badan 10 maalmood oo dugsi oo isku xiga sannad dugsiyeedka, taas waxaa loo arkaa inay tahay bedelka meelaynta waxbarasho ee ilmahaada.

Haddii dugsiga Degmada ay ilmahaada ka saareen goobtiisa ama goobteeda waxbarasho ee hadda dhowr jeer oo kala duwan (taxane ka saarida) oo marka la isku geeyo gaaraya wax ka badan 10 maalmood sanad dugsiyeedka, Degmada waa inay go'aan ka gaadho haddii ka saaristaasi ay noqon karto beddelida meelaynta waxbarasho ee ilmahaada. Samaynta go'aankan, Degmada waa in ay tixgelisaa arrimaha soo socda:

- Dherarka mar kasta oo ilmahaaga laga saaray;
- Wadarta wakhtiga ilmahaaga laga saaray;
- Sidee iskugu dhowaayeen ka saarida; iyo
- U ekaanshaha dabeecadda ilmahaaga anshaxiisii ama anshaxeedii dhacdooyinkiii hore ee ilmahaaga loo eryay.

Marka loo beddelayo meelaynta waxbarasho ee ilmaha, sababo la xariira ilmahaaga oo aan raacayn xeerarka dugsiga, dugsiga degmada, waalidka, iyo xubnaha ku haboon ee kooxda IEP waa inay kulmaan si ay u sameeyaan dib u eegis go'aanka soo baxay. Ujeedada dib u eegis go'aanka muuqda waa in la go'aamiyo haddii dabeecadda ilmahaaga ayaa sababtay ama uu ku lahaa xidhiidh toos ah oo muuqda naafanimada ilmahaada.



## Astaanta Go'aaminta

Ka hor inta aan loo beddelin meelaynta waxbarasho ee ilmahaaga sababao anshaxa, Degmada waa in ay qaadaan tallaabooyinka gaarkood si ay u ilaaliyaan xuquuqda ilmahaaga. Mid ka mid ah talaabooyinkaas waa in ay qabtaan shirka dib u eegis astaanta go'aaminta. Kani waa kulan lagu ogaanayo haddii dabeecadda ilmahaaga ayaa tahay sabab toos ama uu ku lahaa xidhiidh toos ah oo muuqda naafada ilmahaaga. Haddii si kale loo dhigo, dhaqanka ilmahaagu ma waxaa ku sababtay naafonimadiisa ama naafonimadeeda? Kooxda IEP ee ardayga ayaa go'aamin doona haddii uu dhaqanka ilmahaagu sabab u ahaa naafada 10 maalmood oo maalmaha dugsiga gudahood ka dib go'aanka kasta oo ah inay wax ka bedelaan meelaynta waxbarashadiisa.

**Fadlan Ogsoonow**

**Ilmahaaga waxaa loola dhaqmaya xeerarka iyo anshax la mid ah kuwa arday kasta oo dugsiga iyo sii wadi doonaa si ay u helaan adeegyada ku qeexan IEP, laakiin waxaa laga yaabaa inaysan ahayn isla meelaynta.**

### Shirka Dib u Eegista Astaanta Go'aaminta

Kulanka dib u eegista astaanta go'aaminta, adiga iyo xubnaha kale ee kooxda IEP ayaa dib u eegaya macluumaadka la xiriira oo ay ku jiraan IEP, kormeerka macalimiinta ilmahaaga iyo macluumaad kasta oo la siiyay.

Haddii dhaqanka uu yahay astaamaha naafanimada ilmahaaga, ilmahaagu waxaa lagu celin doona meelayntii kolkii hore taas oo isaga ama iyada laga soo bedelay, haddii aysan kooxda IEP isku waafaqin wax ka bedelida meeleynta.

Haddii dhaqanka ilmahaaga la ogaado inuu yahay astaamaha naafada, kooxda IEP waa inay:

1. Bilowdaa qiimeeynta dabeecadda aassaasiga 10 maalmood gudahood oo ku dhammeeyaan sida ugu dhaqsaha badan. Waxqabadka qiimeeynta dabeecadda aassaasiga waa dib u eegidda dhaqanka ilmahaaga taas oo loo isticmaalayo si loo ogaado waxyaahaba, ilmahaaga deegaankiisa , ee keenaya anshax xumada, iyo sidoo kale nooca wax ka bedelida dabeecadaha u baahan in la baro si ilmahaaga u heli natiijooyin iyo jawaab-celin wanaagsan; iyo
2. U biloowdo qorshaha ka hortaga dabciga ilmahaaga haddii qiimeynta dabeecadda aassaasiga horay loo soo buuxiyo oo ay la xiriirto anshaxa hadda dhacaya. (Qorshaha kahortaga dabciga wuxuu ka hadlaya hab dhaqanka aan ku haboonnayn dugsiga iyo siyaabo gaar ah oo dugsigu iskugu dayi doono si loo yareeyo.); ama
3. Haddii qorshaha kahortaga dabeecdda uu horay u jiray, inay dib u eegaan qorshaha iyo ku sameeyaan isbedelada loo baahan yahay 10 maalmood gudahood.



## Beddelka Kale (ku meelgaar ah iyo kala duwan) Goobta Waxbarashada

Go'aanka ah in lagu meeleeyo ilmahaaga goob waxbarasho oo bedelaad ku meelgaara (IAES) waxaa sameeya kooxda IEP ee ilmahaaga. IAES waa in si ku meelgaara, loogu meeleyo goob kale si uu ilmahaadu u helo waxbarashada gaarka ah. Taariikhda kooxda IEP ay go'aamiyaan inay u baddasho meelaynta ilmahaaga si IAES ah sababta oo ah ilmahaaga oo ku xadgudbay xeerka dugsiga, Degmada waa inay
ku soo ogaysiisaa go'aanka iyo ku siiyaan Buugga Hagaha Xuquuqda Waalidka ee Waxbarashada Gaarka ah.

- Xitaa haddii dhaqanka ilmahaagu sabab u ahaa naafada ilmahaaga, waxaa laga yaabaa in Degmada ilmahaaga u bedesho IAES illaa iyo 45 maalmo oo dugsi, haddii u ilmahaagu: Soo qaateen hub;
- Si ogaansho ah u haysto ama u isticmaalo daroogo sharci darro ah, ama iibiyo ama isku dayay inuu gato ama la iibsado walaxda la kantaroolo (tusaale ahaan, maandooriyeyaasha); ama
- U geysto dhaawac halis ah jirka qof kale.

Tani waxay guud ahaan khuseysa haddii ilmahaagu ku sameeyay dhaqmadaan isaga ama iyada inta uu ku sugan yahay jidka dugsiga, dugsiga ama meel howlo dugsiga lagu qabanayo.

Haddii dhaqanka ilmahaagu ***aanu ahayn mid ay si toos ah u keenaan naafada ilmahaaga***, ilmahaaga waxaa lagu qori karaa IAES wakhti la mid ah wakhtiga ilmaha aan naafada ahayn lagu edbin lahaa.

Haddii dhaqanka ilmahaagu ahaa ***mid si toos ah ula xiriirta ama ay keentay naafada ilmahaaga*** iyo ilmahaaga ku xadgudbay sharciyada dugsiga, ilmahaaga waa in lagu celiyaa goobtii waxbarasho ee isaga ama iyada laga soo saaray, haddii aysan adiga iyo Degmada ku heshiin in loo beddel meeleyn iyadoo qayb ka ah qorshaha faragelinta isbadalka dabeecadda ama IEP.

Hase ahaatee, haddii ay Degmada aaminsan tahay in ku haynta ilmahaaga meelaynta waxbarasho ee hadda (sida uu dhigayo IEP ilmahaaga) ay u badan tahay inay ku keento dhaawac ilmahaaga ama kuwa kale, dugsiga degmada ayaa iskugu wici kara shirka IEP si looga wada hadlo walaacaas. Haddii adiga iyo Degmada aadan isku raacsaneyn isbedelka meelaynta, degmada waxay codsan kartaa dhagaysi dacwadeed oo degdeg ah - haddii si kale loo dhigo, waxay codsan kartaa dhageysiga dacwadeed oo noqon doona mid degdega oo loogu talagalay xal degdeg ah (Ka eeg nidaamka xaquuq dhowrista degdegta ah bogga 25).

### Haddii Aadan Raali Ka Ahayn Bedelaada meelaynta waxbarasho ama Natiijada Dhagaysiga Dib u Eegista Astaamaha Muuqda

Waxaad codsan kartaa dhagaysi dacwadeed oo degdeg ah si aad uga doodid go'aankan ah in wax laga beddelo goob waxbarashada hadda ee ilmahaaga ee ay sababtay anshax ama inaad ka doodid natiijada dib u eegidda go'aanka astaamaha. (Eeg macluumaadka nidaamka xuquuq dhowrista ee bogagga 24 - 25). Sarkaal dhexdhexaad ka ah dhagaysiga ayaa go'aamin doona inta lagu guda jiro dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista degdega haddii dugsiga Degmada raacay shuruudaha markii ay wax ka isbedeshay meelaynta ilmahaaga ama haddii Degmada ay muujisay in dhaqanka ilmahaagu uu ahaa ama ahayn astaamo ka yimid naafonimada ilmahaaga.

Sida kor ku xusan, dugsiga Degmada waxay codsan karaan dhageysiga nidaamka xaquuq dhowrista degdegta haddii Degmada ay aaminsan tahay in sii socoshada meelaynta ilmahaaga ay u badan tahay in ay ku keento dhaawac ilmahaaga ama kuwa kale. (Eeg nidaamka xaquuq dhowrista degdegta ah ee bogga 25).

**Marka Dhaqanka Ilmahaaga Loo Maleeynayo Inay Sababtay Naafanimo**

**Haddii ilmahaagu uusan haysan IEP, waxaad weydiisan kartaa dugsiga in loola dhaqmo ilmahaaga sida ilmo naafo ah haddii mid ka mid ah waxyaalahan dhacay ka hor inta uusan ilmahaagu ku xadgudbin xeerka dugsiga:**

- **Waxaad ugu sheegay madaxda dugsiga ama macallinka ilmahaaga, qoraal ahaan, in aad u malaynayso in ilmahaagu u baahan karo adeegyada waxbarashada gaarka ah; ama**
- **Waxaad codsatay in la qiimayo ilmahaaga; ama**

**Macalinka ilmahaaga ama xubin kale oo shaqaalaha dugsiga degmada ayaa si toos ah ugu sheegeen Agaasimaha degmada ee waxbarashada gaarka ah ama shaqaalaha kale ee maamulka welwelka gaar ah ee ku saabsan hannaanka edaabta ilmahaaga. Dugsiga degmadaada lagama filayo inay ula dhaqmaan ilmahaaga sida ilmo naafo ah haddii aad diiday inaad siiso fasax ay degmada ku qiimeeyaan ilmahaaga inuu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah. Tani sidoo kale waa run haddii aad diiday waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ilmahaaga ama haddii ilmahaagu la qiimeeyay oo kooxdu go'aansaday inuusan ilmahaagu naafo ahayn. Degmada waxay u edbin karaa ilmahaaga si la mid ah siday u edbin lahyd ardayda aan naafada ahayn kuwaasoo u dhaqma sidiiso kale.**



# Waalidinta oo Ugu Qora Caruurtooda Naafada ah Dugsiga Gaarka ah Kharasha Dadweynaha

## Geedi socodka Go'aaminta Dhaqaale ucelinta

Haddii aad doorato in aad ku meelayso ilmahaaga dugsi gaar loo leeyahay, degmada ma aha inay bixiyaan kharashka waxbarashada ama waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira dugsiga gaarka ah hadiiba ay Degmada ilmahaaga u soo jeedisay waxbarasho bilaash ah oo ku haboon dadweynaha(FAPE ) degmada. Haddii aad aaminsan tahay in Degmada ku fashilantay in ay siiso ilmahaaga FAPE, waxaad fursad u haysataa inaad soo gudbiso cabasho dacwadda halkaas oo dhageysi la qaban doono iyo sarkaal dhexdhexaad ka ah dacwada soo saari doono go'aan ah inay Degmada siiyaan FAPE ilmahaaga (Eeg macluumaadka nidaamka xaquuq dhowrista ee bogagga 21-27). Haddii uu go'aamiyo sarkaalka dhexdhexaadka ka ah dhegaysiga inta lagu guda jiro nidaamka xaquuq dhowrista inaysan degmadaadu bixin FAPE, wuxuu sarkaalka dacwada go'aan ku gaari kara inaad xaq u leedahay in lagu soo celiyo (dib lagugu celiyo) kharashka kaaga baxay dugsiga gaarka ah ee aad ku meelaysay ilmahaaga.

### Dhimista ama Lahaanshada Dhaqaale ucelinta

Xadka uu la'egyahay qiimaha degmada looga baahan karo inay dib ku soo celiso waa la dhimi karaa ama la joojin karaa dhamaantiis haddii mid ka mid ah kuwan soo socda ay dhacaan:

- Kulankii IEP ee dhacay ka hor intii aanad ilmahaaga dugsiga ka saarin, uma aadan sheegin dugsiga in aadan aqbali doonin meelaynta waxbarasho ee ay soo jeedisay kooxda IEP iyo uma aadan sheegin inaad ka saluugsan tahay, oo aad qorsheeynayso inaad ilmahaaga dugsi gaar loo leeyahay ku qorto, ama
- Uguma aadan sheegin si qoraal ahaana dugsiga ku ugu yaraan 10 maalmood ka hor intii aadan ilmahaaga ka saarin degmada oo aadan aqbalaynin IEP oo aad qorsheyneysid inaad ilmahaaga dugsi gaar loo leeyahay ku qortid. Kuwan
  10 maalmood oo shaqo ah waxaa ka mid ah ciidaha dhaca maalmaha shaqada, ama
- Haddii ka hor inta aadan ka saarin dugsiga ilmahaaga, Degmada ay ku siisay ogaysiis haboon oo qoraal ah oo shaagaya inay qorsheeynayso inay qiimeyso ilmahaaga, oo ilmahaaga aadan diyaar uga dhigin in la qiimayo; ama
- Maxkamad go'aamiso in aad si aan macquul ahayn u dhaqantay.

### Badbaadinta Dhaqaale ucelinta

Lacag celinta (qiimaha ay tahay in dib lagugu celiyo) lama dhimi karo, ama dib u bixinta laguma diidi karo haddii:

- Degmada kuu diiday inaad bixiso ogeysiis;
- Degmada aanay kuu sheegin in lagaga baahan yahay inaad bixiso ogeysiis, ama
- Bixinta ogeysiiska ay ku keeni kartay waxyeello jirka ah ilmahaaga.

Sidoo kale, maxkamadda ama sarkaalka dhageysiga ayaa go'aamin kara in qiimaha lacag u celinta laga yaabaa inaan la yareyn ama lagugu diidin bixin la'aanta ogeysiiska haddii:

- Aadan aqrin karin ama qorin karin Ingriiska; ama
- Bixinta ogeysiiska uu ku keeni karo waxyeello daran shucuurta ilmahaaga.



# Ogeysiinta Waalidka ee Barnaamijyada Deeqda Waxabarsho ee Ardayda Naafada ah

## Marka Ogeysiintu Dhacdo

Mar kasta oo ay Degmada dhameystirayso qiimeyn ilmo naafo ah, ama ay biloobayso inay sameyso, dib u eegto ama diido IEP ilmaha, Degmada waa in ay u sheegto waalidka ilmaha waxyaabaha ku saabsan Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee Autism iyo Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee Jon Peterson.

### Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee Autism

Haddii ilmahaagu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah oo hoos yimaaada dabaqad autism, waxaad u qalmi kartaa Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee Autism. Marka la eego barnaamijka, waxaad dooran kartaa inaad u dirto ilmahaaga barnaamijka waxbarashada gaarka ah oo aan ahayn mid ka mid ah kuwa uu ku shaqeeyo dugsiga degmada aad dagantahay, halkaasoo uu ilmahaagu ka heli doono waxbarashada iyo adeegyada ku qeexan IEP isagu ama iyadu leeyahay.

Si aad ugu qalantid barnaamijka, ilmahaagu waa inuu:

- Ay ku ogaadeen dugsiga degmada aad deggan tahay inuu ilmahu qabo autism;
- Waa in uu leeyahay hadda IEP dugsiga degmada aad deggan tahay oo aadna ku raacsan tahay iyo uu yahay mid la dhameystiray; iyo
- Waana in uu ahaadaa ugu yaraan saddex sano jir.

Macluumaad dheeraada oo ku saabsan Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee Autism, booqo bogga internetka ee Waaxda Waxbarashada Ohio: education.ohio.gov iyo Ka raadi ***Barnaamijka Deeqda Waxbarasho*** ee Autismeducation.ohio.gov and type  sanduuqa raadinta, ama email ugu soo dir autismscholarship@education.ohio.gov.

### Barnaamijka Deeqda Waxbarasho ee Baahida Gaarka ee Jon Peterson

Haddii ilmahaagu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah, waxaad u qalmi kartaa Barnaamijka Baahiyaha Peterson Jon ee Gaarka ah. Marka la eego barnaamijkan, waxaad dooran kartaa inaad ku qorto ilmahaaga barnaamijka waxbarashada gaarka ah oo aan ka ahayn mid ka ku shaqeeya dugsiga degmada aad dagantahay, halkasoo uu ilmahaagu ka heli doono waxbarashada iyo adeegyada ku qeexan IEP isagu ama iyadu leeyahay.

Si aad ugu qalanto deeqda waxbarasho ee Baahiyaha Gaarka ah ee Jon Peterson, ilmahaagu waa inuu:

- Waa in ay ka heshay dugsiga degaanka degmadaada ilmuhu inuu naafo qabo;
- Waa in uu leeyahay hadda IEP ga dugsiga degmada aad deggan tahay oo aadna ku raacsan tahay iyo uu yahay mid la dhameystiray; iyo
- Waa in u qalanto inuu dhigto fasalada xanaanada ilaa iyo fasalka 12.

Wixii macluumaad ah oo ku saabsan Barnaamijka Deeqda WaxbarashadaBaahida Gaarka ah ee Jon Peterson; booqo bogga internetka Waaxda Waxbarshada Ohio
***ee ah: education.ohio.gov iyo Ka raadi sanduuqa*** deeqda Jon Peterson, ama email ugu soo dir peterson.scholarship@education.ohio.gov..

Macluumaad dheeradaWarbixin ku saabsan barnaamijyada deeq waxbarasho waxaa laga heli karaa bogga internetka Waaxda Waxbarashada Ohio ee ah: education.ohio.gov..

Wixii macluumaad dheeraad ah ama su'aalo ku saabsan barnaamijyadaas deeqaha waxbarasho, kala xiriir: Xafiiska Fursadaha Waxbarashada ee Aan ahayn kuwa Bulshada(614) 466-5743 ama qadka bilaaska ah: (877) 644-6338.

Ohio | Department of Education

education.ohio.gov